Casharka Tababarka ee Koorsada Fulinta oo ku aaddan:

# SIDII LOO SAMEYN LAHAA SIYAASAD DHUL LOO DHAN YAHAY



*Loogu talagalay Gobolka Soomaaliya*

Photo: AU UN IST/Tobin Jones https://flic.kr/p/hurQjd

UN-HABITAT FOR A BETTER URBAN FUTURE

GLTN GLOBAL LAND TOOL NETWORK

Casharka Tababarka ee Koorsada Fulinta oo ku aaddan: Sidii loo sameyn lahaa Siyaasad Dhul Loo Dhan yahay - Loogu talagalay Gobolka Soomaaliya

Xuquuqda Daabacaadda © Barnaamijka Qaramada Midoobay ee Degsiimooyinka Aadanaha, 2020

Dhamaan xuquuqda ayaa loo leeyahay

Barnaamijka Qaramada Midoobay ee Degsiimooyinka Aadanaha (UN-Habitat)

Sanduuqa Boostada 30030, Nairobi 00100, Kenya

Tel: +254 20 762 3120

Fakis: +254 20 762 3477

www.unhabitat.org

Nambarka HS:

Nambarka ISBN:

**Afeef**

Qeexitannada iyo soo bandhigista ku xusan warbixintaan maaha kuwa muujinaayo fikir ka soo baxay Xoghaynta Qaramada Midoobay oo ku aaddan xaaladda sharci ee waddan, dhul, magaalo ama meel, ama mas'uuliyintiisa, ama ku saabsan ka-takhalusidda xudduudaheeda, ama khuseeyo nidaamkiisa dhakhaale ama heerka horumarka. Falanqeynta, gabagabada iyo talooyinka warbixintaan maahan inay ka turjumayaan aragtiyada Barnaamijka Qaramada Midoobay ee Degsiimooyinka Aadanaha ama Golaheeda Maamulka.

**Mahadnaq**

Macluumaadkaan tababarka waxaa la soo saaray iyadoo la adeegsanaayo hagidda "Sida Loo Sameyn Lahaa Siyaasad Dhul Loo Dhan Yahay: Habka, Hagaha iyo Casharrada", oo ay qortay Clarissa Augustinus, oo xiligaas ahayd Madaxa Qeybta Dhulka iyo Maamulka Hantida iyo Erika Lind, oo xiligaas ahayd Sarkaalka Barnaamijka Qeybta Dhulka iyo Maamulka Hantida, Laanta Hoyga, UN-Habitat, iyagoo gacan ka helaaya Klaus Deininger ee Bangiga Adduunka (World Bank) iyo Paul Mundy oo dhanka tifaftirka ka caawiyay.

U beddelidda Afka Soomaaliga waxaa u xilsaarnaa Ombretta Tempra, Sarkaalka Degsiimooyinka Aadanaha, Dhulka, Hoyga iyo Qeybta Guriyeynta iyo Fathi Egal, Sarkaalka Barnaamijka Dalka Soomaaliya, UN-Habitat oo ay taageerayeen Eleonora Francesca Serpi, El Habib Benmokhtar iyo Jean du Plessis, oo ka socda Qeybta Dhulka, Hoyga iyo Guriyeynta UN-Habitat.

Faahfaahin dheeraad iyo xiriirada waxaa laga heli karaa [www.gltn.net](http://www.gltn.net)

# Tusmada Buugga


Xarfaha iyo soo gaabinta ..... 5

Asalka iyo macluumaad ku saabsan Casharka tababarka ..... 6

Ujeeddada koorsada tababarka ..... 6

Waxyaabaha ku jira tababarka ..... 6

Gudmar cutubyada koorsada ..... 6

Kooxda la beegsanaaoy iyo muddada koorsada tababarka ..... 7

Ujeeddooyinka barashada koorsada tababarka ..... 7

Qoraalada loogu talagalay fududeeyayaasha ..... 7

Qorsheynta koorsada ..... 7

Qiimeynta baahiyaha tababarka ..... 9

Yaa noqon kara fududeeye? ..... 9

Qaabka tababarka: qaab ka-qaybgal ah ..... 10

Xulushada ka-qaybgalayaasha ..... 11

Qiimeynta tababarka ka hor ..... 11

Sida loo qorsheeyo koorsada ..... 11

Fududeynta cutubyada ..... 12

Gudbinta bandhigyada ..... 12

Fududeynta wadashaqeynta ..... 12

Wax ka qabashada doodaha ..... 12

Qorshe hawleed ..... 13

Qiimeyn iyo dib u eegis ..... 13

Aaladaha waxtarka leh ..... 13

Ku saabsan Shabbakada Caalamiga ah ee Qalabka Dhulka ..... 13

Cutub 1-aad. TAARIKH KOOBAN OO KU SAABSAN ARRIMAHA DHULKA EE GOBOLKA SOOMAALIYA ..... 16

1.1. Maamul daciif ah iyo sharciyo badan ..... 16

1.2. Xuquuqda dhulka oo aan caddayn ..... 17

1.3. Nidaamka diiwaangelinta dhulka ..... 18

1.4. Hay’adaha sharciga ah ee maamulka dhulka ..... 19

1.5. Siyaasadda ka saaridda ..... 20

1.6. Barakacayaasha iyo dadka dib u soo laabtay ..... 21

Cutubka 2-aad. HORDHACA SIYAASAD LOO DHAN YAHAY ..... 22

2.1. Xulashada siyaasad dhuleed oo loo wada dhan yahay ..... 22

2.2. Arrimaha siyaasadeed oo ka soo horjeeda kuwa farsamo ..... 23

2.3. Jadwalka hannaanka siyaasadda ..... 23

2.4. Iskuxirka badeecada iyo hawlaha ..... 23

Cutubka 3-aad. MAAREYNTA KHILAAFAADKA IYO SIYAASADDA 25
3.1. Qaab deggan 25
3.2. Samee qorshe hawleed waxqabadyo 26
3.3. Kooxaha shaqada oo mowduucyo leh 26
3.4. Tixgelinta jinsiga 27
3.5. Ku dhisidda waxyaabaha jira 27
3.6. Maareynta “siyaasadda” hannaanka 28
Cutubka 4-aad. WAX KA QABASHADA ARRIMAHA FARSAMADA IYO IN DADKA LAGU WARGELIYO INAY KU LUG YEESHAAN 30
4.1. Si wax looga qabto arrimaha farsamada 30
4.2. Muhiimadda ay leedahay in dadka la wargeliyo oo laga qaybgeliyo 31
Cutubka 5-aad. TAAGEERIDDA OGGOLAANSHAHA IYO HIRGELINTA 32
5.1. Tillaabooyinka loo maro ansixinta iyo hirgelinta siyaasadda 32
Cutubka 6-aad. GEEDI SOCODKA SIYAASADDA DHULKA 33
6.1. Doorka muhiimka ah ee casharka dhulka 33
6.2. Toban qodob oo muhiim u ah geedi socodka siyaasadda dhulka 33
LIFAAQYADA 35
Lifaaqa 1-aad. Foomka magacaabidda ka qaybgalaha 35
Lifaaqa 2-aad. Qiimeynta tababarka ka hor 37
Lifaaqa 3-aad. Qaabka khibradda 39
Lifaaqa 4-aad. Shaqo kooxeed: Maareynta khilaafaadka ka dhalan karo “siyaasadda” hannaanka 40
Lifaaqa 5-aad. Shaqo kooxeed: Door-ciyaar 41
Lifaaqa 6-aad. Qorshe hawleed 45
Lifaaqa 7-aad. Foomka qiimeynta ugu dambeysa 47
Lifaaqa 8-aad. Bogag 49
TIXRAACYADA 50

## Xarfaha iyo soo gaabinta

FFP: Ku habboon ujeeddo (Fit-for-purpose)

GLTN: Shabbakada Caalamiga ah ee Qalabka Dhulka(Global Land tool Network)

IDP: Dadka Gudaha ku Barakacay (Internal Displaced Person)

NGO: Hay’ad Aan Dowli Ahayn (Non-Governmental Organization)

UN-Habitat: Barnaamijka Qaramada Midoobay Ee Degsiimooyinka Aadanaha (United Nations Human Settlements Programme)

# Asalka iyo macluumaad ku saabsan Casharka tababarka

## Ujeeddada koorsada tababarka

UN-Habitat iyo Shabbakada Caalamiga ah ee Qalabka Dhulka(GLTN) ayaa soo saaray koorsadaan tababarka iyagoo ka jawaabaya baahida sii kordheysa ee is-weydaarsiga aqoonta iyo awoodda dhinaca horumarinta siyaasadda dhulka iyo guriyeynta, xuquuqda dhulka, iyo hantida Gobolka Soomaalida.

Ujeeddada tababarka waa in lagu xoojiyo awoodda wakiilada dowladda Soomaaliyeed iyo jilayaasha kale ee dhulka oo ay khuseyso ee ku aaddan horumarinta, hirgelinta iyo la socoshada damaanadda muddada degnaanshaha dhulka iyo siyaasadaha loo dhan yahay ee dhulka. Koorsada tababarka waxay bixisaa waddo ku saleysan khibradaha laga soo uruuriyay waddamo kale, gaar ahaan Afrika iyo Aasiya. Koorsada waxay sidoo kale sharraxeysaa hanaan la qaadan karo oo ku habboon xaaladda iyo wajiga gaarka ah ee siyaasadda dhulka ee u baahan in wax laga qabto. Cutubyada waxaa loogu talagalay loona habeeyay xaaladda Soomaali balse way ku habboonaan kartaa dalalka kale.

## Waxyaabaha ku jira tababarka

Waxyaabaha ku jira koorsadaan tababarka waxay ku saleysan yihiin hagaha “Sida Loo Sameeyo Siyaasad Dhul Loo Dhan Yahay” oo ay soo diyaarisay UN-Habitat iyo Shabakadda Aalada Dhulka ee Adduunka (GLTN) ee 2007-di. Nuxurka iyo qaabeynta koorsadaan waxaa xoojiyay xirfadaha saaxibada GLTN, fududeeyayaasha iyo khubarrada muhiimka.

Casharka tababarka waxaa loo qaybiyay lix cutub, mid walbana wuxuu ka hadlaaya mowduuc gooni, oo loo soo bandhigay sidaan:

Cutub 1**. TAARIKH KOOBAN OO KU SAABSAN ARRIMAHA DHULKA EE GOBOLKA SOOMAALIYA**

Cutub 2. **HORDHAC SIYAASAD DHUL LOO DHAN YAHAY**

Cutub 3. **MAAREYNTA KHILAAFAADKA IYO SIYAASADDA**

Cutub 4. **WAX KA QABASHADA ARRIMAHA FARSAMADA IYO IN DADKA LAGU WARGELIYO IYO INAY KU LUG YEESHAAN**

Cutub 5. **TAGEERIDDA OGALAANSHAHA IYO HIRGELINTA**

Cutub 6. **HANAANKA SIYAASADDA DHULKA**

## Gudmar cutubyada koorsada

| Cutub | Waxyaabaha ku jira | Soo koobid |
|---|---|---|
| **1** | Taarikh kooban oo ku saabsan arrimaha dhulka ee Gobolka Soomaaliya | Cutubkaan wuxuu soo bandhigaaya taarikhda iyo arrimaha aasaasiga ee dhulka oo ku habboon Gobolka Soomaaliya. |
| **2** | Hordhac siyaasad dhul loo dhan yahay | Cutubkaan wuxuu soo bandhigaaya fikradda “siyaasad dhul loo dhan yahay” iyo in u sharraxo muhiimadda abuurista siyaasadaan oo kale. |
| **3** | Maareynta khilaafaadka iyo siyaasadda | Cutubkaan wuxuu ka hadlaayaa arrimaha siyaasadeed iyo farsamo ee ka dhalan karo horumarinta siyaasado loo dhan yahay wuxuuna soo jeedinayaa istrateejiyo lagu maareeyo khilaafaadka jira. |

| | | |
|---|---|---|
| **4** | Wax ka qabashada arrimaha farsamada iyo in dadka lagu wargeliyo iyo inay ku lug yeeshan | Cutubkaan wuxuu sharraxayaa muhiimadda ay leedahay saamileyda saxda ah inay ku lug yeeshaan hannaanka iyo horumarinta siyaasadda. |
| **5** | Taageridda ogalaanshaha iyo hirgelinta | Cutubkaan wuxuu sharraxayaa tillaabooyinka aasaasiga ee lagu ansixiyo laguna hirgeliyo siyaasadda. |
| **6** | Hannaanka siyaasadda dhulka | Cutubkaan wuxuu caddeynayaa doorka muhiimka ah ee qalabka dhulka iyo tobanka qaybood ee hannaanka siyaasadda dhulka. |

### Kooxda la beegsanaaoy iyo muddada koorsada tababarka

Koorsadaan tababarka waxaa loogu talagalay wakiilada dowladda Gobolka Soomaaliya, iyo sidoo kale daneeyayaasha kale iyo siyaasad dejiyayaasha kale ee wax ka qabanaaya arrimaha dhulka, sida jilayaasha bani'adamnimada iyo horumarka, deeq bixiyeyaasha, xirfadlayaasha dhulka, la-taliyayaasha, Hay'adaha Aan Dowliga Ahayn (NGOs) iyo wakiilada bulshada rayidka ee ku hawlan horumarinta, hirgelinta ama la socodka siyaasadaha dhulka. Xaqiiqdii, ka-qaybgelinta dhamaan kooxahaan iyo isku dhafka xirfadaha waxay muhiim u tahay siyaasadaha soo socda inay noqdaan kuwa siyaasad ahaan la aqbali karo, farsamo ahaan la gaari karo, dhamaan dadka iyo kooxaha ay u dhan yihin isla markaana leh awood lagu dhaqan galiyo. Cutubyadaan waxaa loo isticmaali karaa cashar tixraac iyo inay noqdaan aalad asal ah oo loogu talagalay aqoon iswaydaarsiga iyo kalfadhiyada wadahadalka. Cutubyadaan waxay sidoo kale noqon karaan qalab loogu talagalay, koorso tababar oo 2-3 maalin.

### Ujeeddooyinka barashada koorsada tababarka

Kaddib marka ay dhameeyaan koorsadaan, ardeyda waxay awoodi doonaan inay:

1. Faahfaahiyaan qaybaha ugu muhiimsan ee geedi socodka sameynta siyaasad dhul loo wada dhan yahay.
2. Sharraxaan muhiimadda uu lee yahay geedi socod daneeyayaal badan, jinsi iyo da' loo dhan yahay.
3. Falanqeeyaan dhinacyada siyaasadda iyo farsamada sameynta iyo hirgelinta siyaasad dhul loo dhan yahay.
4. Ka qayb galaan oo si guul leh u hoggaamiyaan ama wax ku kordhiyaan geedi socodka siyaasad dhul loo dhan yahay.

## Qoraalada loogu talagalay fududeeyayaasha

### Qorsheynta koorsada

Baahiyaha tababarka iyo xaaladaha way kala duwanaan karaan; sidaas darteed, qorshuhu waa in uu sadaaliyo isla markaana tixgeliyo isbedelleda sida dheerarka iyo qaabka aqoon isweydaarsiga, khibradda fududeeyayaasha, heerka aqoonta iyo xirfada ka qaybgalayaasha iyo xaalada tababarka.

Habka wanaagsan ee barashada wuxuu leeyahay saddax tillaabo oo cad: diyaarin, wax qabad, iyo dabagal, inkastoo ay dhici karto isugeyn u dhaxeysa tillaabooyinka, dib u laabashada ayaa marmar laga maarmaan ah. Shaxda hoose waxay soo koobeysaa qaybaha waxqabadka wanaagsan ee tillaabo kasta oo ku saabsan waxqabadka barashada, kaas oo carabka ku adkeeyay in diyaarinta iyo dabagalka ay si siman sida waxqabadka u muhiimsan yihin.

<table>
<tr><td colspan="3">Qaybaha tababarka wanaagsan ee waxqabadka barashada</td></tr>
<tr><td>Diyaarin<br><br>- Caddee ujeeddada waxqabadka marka loo eego baahiyaha gaarka ah ee wax laga qabanaayo<br><br>- Aqoonso qodobada hordhaca kadib na ka gorgortan ka faa'iideysigooda<br><br>- Aqoonso kooxda saxda ee la bartilmaameysanaayo: ka heshiiya shuruudaha waara ee ka-qaybgalka kana gorgortan sidii aad dadka saxda ah isugu keeni laheyd (tan waxay tahay tillaabada ugu muhiimsan ee diyaarinta)<br><br>- La tasho oo sameyso ujeeddooyinka barashada ku habboon oo ku saleysan kartida awood jirta iyo baahiyaha ka-qaybgalayaasha<br><br>- Ka-qaybgalayaasha ka-qaybgali mid ka mid ah hawsha diyaarinta (aqrinta, isqiimeynta, diyaarinta tabaruca, iwm.)<br><br>- Xaqiiji in u jiro waqti ku filan in loogu diyaar garoobo: naqshadeynta geedi socodka barashada; kuwa fududeynaya; iyo, wixi qalab ama kheyraad oo loo baahdo</td>
<td>Waxqabad<br><br>- Isticmaal casharka saxda ah iyo tillaabooyinka taxanaha si aad u abuurto geedi socod ku habboon baahiyaha, balse ah mid dabacsan oo la beddeli karo haddii loo baahdo<br><br>- Waqti qaado ka hor inta aadan bilaabin tillaabooyinka muhiimka ah si aad u caddeyso waxyaabaha lagaa filaayo iyo ujeeddooyinka<br><br>- Hayso dad ku habboon kuna filan kheyraadka geedi socodka lagu tageerayo<br><br>- Fududee inti aad bari lahayd, adigoo isticmaalaya qabab isku dhafan sida ku habboon<br><br>- Xaqiiji in dhamaan ka-qaybgalayaasha ay geedi socodka barashada ku biirin karaan aqoontooda, khibradooda iyo fikiradahooda<br><br>- Samee bay'ad dhisayso furfurnaan, daacadnimo (gar ahaan ku saabsan guuldarroyinka), su'aal weydiin iyo rabitaanka aad wax ku wadaagi lahayd<br><br>- Dib u eeg horumarka</td>
<td>Dabagal<br><br>- Xaqiiji in hawlaha dabagalka ay marka ugu horeyso ku dhisan yihin qaabeynta<br><br>- Xaqiiji marka ay surtagal tahay in ka qaybgalayaasha ay ku laabtaan bay'ad awood u siinayso inay ku adeegsadaan wixii ay barteen<br><br>- Marna ha hilmaamin in waxbarashada ugu wanaagsan ay ka imaado caqabadaha iyo guuldarrada imaan karo marka la isku dayaayo in la adeegsado waxbarasho cusub<br><br>- Raadi qaabab aad ka-qaybgalaayasha ku siiso dhiirigelin iyo taagero xoogan si ay ula tacaalaan dhibaatooyinka taasi oo u horseedeyso waxbarasho qooto dheer<br><br>- Kheyraadka diyaar ka dhig</td></tr>
<tr><td colspan="3">Guusha waxay ka kooban tahay:<br>1. Xulashada ka qaybgalayaasha saxda ah<br>2. Ka-qaybgalinta wada hawlgalayaal badan<br>3. Diyaarin ku filan iyo naqshad xasaasi u ah macnaha guud<br>4. Ka-qaybgalayaasha iyo fududeeyayaasha ayaa dhamaan ah:<br>• Kuwa xiiso u qaba fikrado hal abuur, aragtiyo, fikirro iyo wajiyo cusub, iyo inay diyaar u yihin inay la jaanqaadaan dhibaatooyinka<br>• Kuwa diyaar u ah inay aqoon iyo xirfado ku wadaagaan hab furfuran oo daacad ah, in midba midka kale uu dhageysto isla markaana la qiimeeyo waxa la maqlo<br>• Kuwa diyaar u ah inay wax bartaan, adeegsadaan, dabaqaan, horumariyaan, dib na u bartaan, gaar ahaan dhanka caqabadaha iyo guldarrada<br>• Dabagal buuxda oo joogta ah oo lagu taageeraayo adeegsiga waxbarashada. In kastoo had iyo goor aysan surta gal ahayn, marka la sameyn karo waxay soo kordhisaa faa'iido aad u badan</td></tr>
</table>

*Asalka: UN-Habitat, GLTN (2016) Barashada Kobcinta Casharka Dhulka iyo Hirgelinta Hagaha Hab-dhaqanka Wanaagsan*

## Qiimeynta baahiyaha tababarka

Qiimeynta baahiyaha tababarka waa tillaabo muhiim u ah qorsheynta barnaamij tababar oo wax ku ool ah. Qiimeynta baahiyaha tababarka wuxuu inta badan diiradda saara xirfadaha hadda jira oo la doonaayo, aqoonta iyo hab-dhaqanka ardayda wuxuuna macluumaadkaan u isticmaalaa in u ku go’aamiyo sida u tababarka waxtar u yeelan karo.

Qiimeynta baahiyaha tababarka waa inay ahaato geedi socod dabacsan oo leh qiimeyn ballaaran oo si tartiib ah noqoneysa mid cayiman. Hawshaan waxaa dib loogu bilaabi karaa toddobo tillaabo, oo qaarkood barbar socod lagu sameyn karo:

1. Xaqiiji baahida iyo asalka dhibaatada
2. Aqoonso daneeyayaasha muhiimka
3. Aqoonso tirada la doonaayo
4. Aqoonso tirada hadda jirta
5. Fahan sida loo horumarin karo tirada hadda jirta
6. Fahan in tababarka u wax ku kordhin karo horumarinta tirada
7. Aqoonso baahiyaha tababarka

Faahfaahin dheeri oo ku saabsan sida loo sameyn lahaa qiimeynta baahiyaha tababarka waxaa laga heli karaa buugga “Qiimeynta Baahiyaha Tababarka iyo Qiimeynta Natiijada Tababarka ee Mawduuca Magaalada” waxaa qoray UN-Habitat (2012).

## Yaa noqon kara fududeeye?

Guud ahaan waxaa jira labo maaddo oo aqoontooda muhiim ah loona baahan yahay in lagu bixiyo koorsadaan: aqoon qooto dheer oo ku saabsan xuquuqda dhulka iyo arrimaha ka jira Gobolka Soomaalida iyo awood wanaagsan ee horumarinta xirfadaha. Waxyaabahaan waxaa laga heli karaa hal qof, ama sida caadiga ah koox fududeeyayaal (laga yaabo labo) oo khibradahooda midba midka kale ku dhameystiraaya.

Maadama tababarka ku habboon yahay in lagu adeegsado goob maxalli ah, waxaa la door bidaa in la helo qof ku hadlo afka Soomaaliga oo yaqaano xaaladda Degaanka Soomaalida. Haddii fududeeyayaasha iyo tababarayaasha aysan ku hadlin afka Soomaaliga, waa in la bixiyo turjubaan xirfad leh.

Tirada fududeeyayaasha loo baahan yahay waxay ku xiran tahay baaxadda kooxda aqoon isweydaarsiga. Kullamada waa weyn waxaa jiri karto doorar kala duwan oo isgaarsin oo ka mid ah barnaamijka loogu talagalay, qabanqaabiyayaasha, fududeeyayaasha iyo shaakhsiyaadka aqoonta gaarka ah ee dheeriga. Fadhiyo kooban oo horudhac oo lala yeelanaayo fududeeyayaasha (iyo dadka aqoonta gaarka leh) ayaa sidoo kale si xoogan lagu talinaaya, si loo xaqiijiyo in faa’iido buxda ay ka soo baxdo ka-qaybgalkooda, iyo dadaalladooda.

**Kobcinta Awoodda**

Kobcinta awoodda waa geedi socod adag oo u baahan qaab isku dhaf ah, oo loogu talagalay in qaab dhameystiran lagula macaamilo xaaladaha gaarka. Noocyada kala duwan ee awoodda ayaa iyaga oo la isku daray loogu baahan yahay inay la kulman caqabad adag, kuwaan waxaa inta badan lagu gartaa xirfadaha “adag” iyo awoodda “fudud” ee bulshadeed, labaduba waa muhiim.

Mid ka mid ah guuldarroyinki ka dhacay qaababki hore ee kobcinta awoodda waxay ahayd fikirka ah in dadka awood khibradeed u leh kuliyad ama maado gaar, tusaale ahaan maareynta ama maamulka dhulka, sida caadiga leh xirfadaha lagama maarmaanka oo dadka kale loogu kobcinaayo awooddaas oo kale. Tan macneheedu waxay tahay in qaab-dhaqameedka wareejinta aqoonta ama "cilmiga" lama adeegsan karo. Taa bedelkeedu, waxaa lagama maarmaan ah in la abaabulo kooxoho iyo in la dhiso hay'ado, dhamaan qaybta dhulka, kuwaas oo leh xirfado la xoojiyay oo iskudar ah oo aan kaliya ku koobneen nuxurka iyo geedi socodka qalab hal abuur oo dhulka, balse sidookale duruufaha maxalliga iyo ah iyo aqoonta, iyo dhaqamada tababarka iyo waxbarashada ku habboon dhaqanka iyo xaaladda.

Istraatijiyada Horumarinta Awoodda GLTN waxaa logu talagalay inay wada isticmaalaan dhamaan Iskaashatada iyo Xoghaynta GLTN. Istraatijiyada waxay soo bandhigtaa qaab waxbarasho firfircoon oo ku saabsan kobcinta awoodda oo ay ku jirto habab iyo farsamooyin kala duwan, jawaabcelin joogta ah, dib u eegis, wadahadal iyo horumarin.

*Asalka: UN-Habitat, GLTN (2014) Istraatijiyada Horumarinta Awoodda GLTN (The GLTN Capacity Development Strategy)*

## Qaabka tababarka: qaab ka-qaybgal ah

Xulashada hababka tababarka oo ku habboon si loo gaaro ujeeddooyinka tababarka waa shaqo muhiim uu ah fududeeyayaasha. Tababarka waxaa loo abaabulay in uu yahay geedi socod waxbarasho ka-qaybgal ah, taas oo uu fududeeyuhu u adeegsan dooono habab kala duwan oo ka-qaybgal si loo hubiyo ka-qaybgal firfircoon ee ardeyda. Hababka noocan ah waxaa ka mid ah:

- **Habka wadahadalka:** waxbarashada waxay guud ahaan ka timaadaa dhanka ka-qaybgalayaasha mana ka timaado macallinka. Waxaa caadi ahaa loo aqoonsan yahay inay ka mid tahay saddaxda nooc ee muhiimka ah: wadahadal toos ah, wadahadal horumarineed iyo wadahadal lagu xallinaayo dhibaatooyinka.
- **Qaabka tijaabada:** waxay dhacdaa marka u qofka qabto hawl, si qooto dheerna u eego hawshaas, falanqaynta na kala soo baxo fikir waxtar leh islamarkaana ku shaqeysto natiijadaas.
- **Habka daraasadda kiiska:** Xaalad dhab ah ayaa loo soo bandhigaa ka-qaybgalayaasha si ay u falanqeyaan xal suurtagalna uga bixiyaan dhibaatooyinka la aqoonsaday.
- **Door ciyaarka:** ka-qaybgalayaasha waxaa loo soo bandhigaa xaalad laga doonaayo inay sahmiyaan iyagoo jilaayo doorarka lagu matalaayo xaaladaas.
- **Falanqayn:** Tan waa farsamo loo adeegsado helitaanka xalalka iyadoo loo maraayo fikradaha dhiirigelinta. Kooxo yar oo dad aqoon u leh ama aan u laheen mowduuca ayaa kulmo waxna ku biiriyo wixi fikir ama talo ee ku soo dhaca. Dhamaan talooyinka waa la dhiirigelinaaya, dhaleeceynta na lama ogalo marxaladaan, inkastoo marka dambe dadka wax ku soo biiriya la siiyo fursad ay ku sharraxaan fikradahooda. Marka xigta, dhamaan fikradaha la soo gudbiyay ayaa la sifeeya oo la qiimeeya.

Qaabka ka-qaybgalka waa aasaaska guul looga gaari karo istraatijiyaada horumarinta awoodda maadama ay dhamaan ka-qaybgalayaasha u ogalaanayso inay wax ku biiriyaan tababarka iyagoo aqoontooda iyo waayo aragnimadooda la imaanaayo. Intaas waxaa sii dheer, waxay ka caawinaysaa isku xirka tababarka iyo xaaladda maxalliga waxayna ka-qaybgalayaasha u ogalanayaan inay faahfaahin ka bixiyaan xallinta caqabadaha gaarka ah oo xiiso iyo dhiirigelin siinaaya inta lagu jiro tababarka.

## Xulushada ka-qaybgalayaasha

Guud ahaan, ugu yaraan 12 iyo ugu badnaan 30 ka-qaybgalayaal ayaa lagu talinaaya. Ka-qaybgalayaasha la soo xulay waa inay lahaadaan aqoon, khibrad iyo inay xiseeyaan maamulka dhulka, iyo inay lahaadaan aqoon iyo waayo aragnimo kala duwan. Iskudarka guud ee ka-qaybgalayaasha waa inay ku jiraan tiro wanaagsan ee wakiillo dumar ah.

Si tababarka looga helo natiijo wanaagsan, waxaa lama huraan ah in la bartilmaameysto ka-qaybgalaayasha saxda ah. Ka-qaybgalaha waa in lagu xusho hanaan magacaabid ama dhiirigelin si loo hubiyo in dadka saxda ah kaliya ay qolka ku jiri doonaan. Foomka magaacibada ka-qaybgalayaasha (eeg Lifaaqa 1-aad) ayaa waxtar u yeelan karo maareynta hanaankaan.

## Qiimeynta tababarka ka hor

Qiimeynta tababarka ka hor waa shay muhiim u ah geedi socodka waxbarashada ka-qaybgalka. Qabanqaabiyayaasha ayaa aqoon isweydaarsiga ka hor la xiriiro ka-qaybgalayaasha iyagoo wata su’aalo ama hawlo gaar ah (oo inta badan loo adeegsado aqoon isweydarsiga). Shaqada tababarka ka hor waxay ka-qaybgalayaasha ku dhiirigelisaa inay tababarka isu diyaariyaan, ka fikiraan doorarkooda iyo dadaalkooda iyo inay sidookale macluumaad ku aaddan hay’adaha ay ka shaqeyaan ku soo biiriyaan aqoon isweydaarsiga.

Shaqooyinka tababarka ka hor waxay muhiim u tahay in la fahmo aqoonta iyo khibradda ay ka-qaybgalayaasha soo kordhinayaan oo gacan ka geysan karto guusha geedi socodka, waxay ay rabaan inay bartaan, ka faa’iidi lahaayeen, iyo sidi ay ugu dabaqi lahaayeen shaqadooda, iyo sida ugu wanaagsan oo ay wax ku baran karaan. Maclumaadka noocaan ah waxaa lagu heli karaa iyada oo loo maraayo foomka shaqada tababarka ka hor ee lagu qiimeeyo xogta ka-qaybgalaha, rajadooda iyo aqoontooda/khibradooda (eeg Lifaaqa 2-aad). Foomka waa la beddeli karaa iyo/ama loo fulin karaa si uu ugu habbonaado baahiyaha tababarka.

Shaqooyinka tababarka ka hor waa in loo gudbiyo fududeeyaha ka hor tababarka, si loo falanqeeyo laguna soo dhex daro barnaamijka tababarka. Fikrad ahaan, xirmada tababarka oo dhan waa in waqti hore loo diro ka-qaybgalayaasha si ay u bilabaan barashada casharka, sidookale waa in lagu dhiirigeliya inay koorsada ku kobciyaan darasadahooda iyo tusaaloyinka la xiriira dhulka.

## Sida loo qorsheeyo koorsada

Hawsha qorsheynta waxay go’aamin doontaa muddada ugu wanaagsan ee barnaamijka tababarka. Tababarka wuxuu bilaaban karaa 9:00 a.m. wuxuuna dhamaan donaa 3:30. Jadwalka waa in waqti uu u qoondeeyo nasasho, qado iyo baahiyaha dhaqameed ee gaarka sida salaadda. Jadwalka waa in uu tixgeliya tirada waxqabadyada uu waqti ku habboon kulan kasto (bandhigyo/ shaqo kooxeed/ wadahadal iyo jawaab celin guud ah).

Kalafadhiga furitaanka waa in uu si fiican u bixiya dulmar guud oo ku saabsan duruufaha iyo ujeeddooyinka guud ee koorsada. Waa fursad dadka martigelinaayo/qabanqaabiyayaasha ku baran karaan ka-qaybgalayaasha ayna uga wadahadlaan rajooyinka iyo ujeeddooyinka tababarka. Qaabka lalyliga khibradda (eeg Lifaaqa 3-aad) waa hab fiican oo ay ka-qaybgalayaasha ku wadaagi karaan meelaha ay khibradda ku leeyihiin iyo dadaalkooda suuragalka ah.

Cutub kasta waxaa loo qorsheeyay inay qaadato ku dhowaad 90 daqiiqo. Waxaa la soo jeediyay in fadhiyada shaqada aysan *sii* soconin in ka badan 90 daqiiqo oo aan nasasho lahayn, si looga fogaado

inay ka-qaybgalayaasha daalan, gaar ahaan marka la eego farsamada, kakanaanta ama xoogga mowduucyada.

## Fududeynta cutubyada

Cutub kasta waa in lagu furo dhowr su’aalood, ama bilow gaaban oo dajinaaya jawi xiisad, si looga qaybgaliyo ka-qaybgalayaasha. Tan waxaa ku xigi karaa soo jeedin kooban u fududeeyaha ku soo bandhigo doono bogaga PowerPoint oo laga heli karo xirmada tababarka.

Soo bandhigidda kaddib, fududeeyaha waa in uu dhiirigeliya wadahadal kooxeed islamarkaana soo jeediyo leyliyo ku saabsan daraasadda xaaladda. Daraasadda xaaladda waxaa soo jeedin kara fududeeyaha ama waxa ay ka imaan kartaa wadahadaal kooxeedka. Fududeeyaha waa in uu soo jeediyo su’aalo ka soo baxay daarasadda xaaladda, laakin sidoo kale la xiriira cutubka oo dhan.

Soo bandhigidda kaddib, waxaa jiro shaqo kooxeed iyo leyliyo (eeg Cutubka 4-aad) oo ujeeddadiisa tahay in ka-qaybgalayaasha looga caawiyo in mabaadi’da mowduucyada la soo badhigay/ akhriyay ay ka fahmaan xaalad shaqo. Fududeeyaha ayaa sidookale dooran karo in uu ku soo daro door-ciyaar (eeg Lifaaqa 5-aad). Ka-qaybgalayaasha waxaa lagu dhiirigelin doonaa inay marxaladaha dalalkooda ku soo biiriyaan wadahadallada iyo inay ka fikiraan. Barnaamijka koorsada waxaa sidookale ka mid ah kalafadhi qorshe hawleed oo lagu dhiirigelinaayo dabagal shaqsiyeed (eeg Lifaaqa 6-aad).

## Gudbinta bandhigyada

Bandhigyada fududeeyayaasha waa inay gabnadaan si ka-qaybgalayaasha loogu dhiirigeliyo inay ka fikiraan khibradahooda iyo inay soo bandhigaan fikradaha doodaha. Fududeeyaha waa in uu ka-qaybgalayaasha haddii ay suragal tahay hore ula wadaago bandhigyada PowerPoint-ka. Mar walbo waqti u qoondey su’aalo iyo wadahadal guud oo aan xadiidnayn, iyadoo wakhtiga iyo qaababka dhexgalka lagu sharraxaayo bilawga.

## Fududeynta wadashaqeynta

Layliyada inta badan, ma jiraan jawaab ‘Hal sax ah’, balse dhowr fursadood oo leh mudnaan kala duwan. Layliyada waxay ku fiican yihin in lagu sameeyo kooxo yar yar, baaxadda waxay ku xiran tahay tirada ka-qaybgalayaasha koorsada iyo tirada kooxaha. Haddii tirada kooxda ay yartahay, waxay u badan tahay in ka-qaybgalayaasha fursad la siiyo iyo in la abuuro heer wadahadal ballaaran. Inta badan, kooxaha waxay u baahan yihin waqti ka dheer midka loo qoondeeyay inay ku wada hadlaan, marka waxaa muhiim ah in la kormeero sida ay wax u wadaan iyo in la ogeysiiyo marka uu waqtigooda dhamaado. Haddana, kalfadhiyada kaddib, koox kasta waa in la siiyo fursad ay warbixin gaaban ku diyaariyaan, oo ku koobnaan doonto kalfadhiga. Soo koobid ku saabsan bandhigyada iyo wadahadallada waa in la qoraa kadibna la guuriya (tusaale ahaan, qofka wax keediya), oo ah xogta dhamaan hawlaha la qabtay.

## Wax ka qabashada doodaha

Inkastoo la dhiirigelinaaya dood wax ku ool ah oo la xiriirta arrimaha muhiimka ah, fududeeyaha waa in uu diido haddii khilaaf xooggan u soo dhexgalo xeerarka aasaasiga. Fududeeyaha waa in uu tan ka hadlo uuna amaano, isaga oo xusaayo in dooda la soo dhaweynaayo laakin aan doodaha oo dhan lagu xallin Karin koorsada. Tan ugu muhiimsan, fududeeyaha waa in uu hubiyo in ka-qaybgale

kaste (si xadidan) ku soo bandhigi karo fikirkooda iyo in qof walbe fikirkiisa la ixtiraamo. Tan waxaa xaqiiqda u gaaarka ah fikradaha laga tira badan yahay ee aqoon isweydaarsiga, oo la doonaayo in fududeeyaha u fursad siiyo.

### Qorshe hawleed

Tababarka waa in lagu soo gabagabeeyo qorshe hawleed firfircoon (eeg Lifaaqa 6-aad). Qorshe hawleedka wuxuu sinayaa fursad ay ku fikiraan kuna fahmaan sida ay u isticmaali lahaayeen una adeegsan lahayeen waxbarashadooda marka ay ku laabtaan gobahooda shaqada, iyo tageerada ay u bahnaan lahayeen si ay u helaan awood ay si wax ku ool wax ugu qabtaan.

### Qiimeyn iyo dib u eegis

Waxa dhaco tababarka kaddib si la mid ah sida tababarka ayay muhiim u yihin. Dabagalka waa in markasta bilawga la tixgeliya, iyadoo laga bilabaayo in ka-qaybgalayaasha la weydiiyo waxa ay ku sameyn doonaan aqoontooda iyo xirfadooda cusub. Kheyraadka tababarka iyo wixi maclumaadka dheeriga waa in loo diyaariyo ka-qaybgalayaasha. Marka ay suuragalka tahay, waa in tababarro fog la siiyo qof kasta oo wajaha caqabad dhanka adeegsada aqoonta iyo casharka.

Jawaabcelinta ka-qaybgalayaasha ee casharka iyo geedi socodka ayaa laga maarmaan u ah horumarinta nuxurka koorsada. Qiimeynta waxaa la sameyn karaa dhamaadka maalin walba ama/iyo dhamaadka aqoon isweydaarsiga (eeg Lifaaqa 7-aad). Foomamka waa in lagu buuxiyo si qarsoodi ah. Marka loo yimaado qiimeynta maalinlaha, qabanqaabiyayaasha ayaa bilawga maalinta xigta bixin karaa jawaabcelin. Haddii tan la sameeyo, waxaa muhiim ah in la hubiyo in qabanqaabiyayaasha iyo fududeeyayaasha ay sidookale tixgeliyaan inay beddelaan waxyaabo qaar oo ka mid ah koorsada iyada oo la eegaayo jawaabcelinta ka-qaybgalaha iyo waxa suragalka ah in la beddelo. Haddii koorsada ay ku jirto kalfadhi qorshe hawleed, waxaa muhiim ah in qabanqaabiyayaasha ay sharraxaan qaabka ay doonayaan inay ula socdaan tillaabooyinka la soo jeediyay.

### Aaladaha waxtarka leh

Qaar ka mid ah aaladaha waxtarka leh ee qorsheynta iyo bixinta tababarka ayaa ah:

- UN-Habitat, GLTN (2014) Istraatijiyada Horumarinta Awoodda ee GLTN (The GLTN Capacity Development Strategy)
- UN-Habitat, GLTN (2016) Barashada Kobcinta Casharka Dhulka iyo Hirgelinta Hagaha Hab-dhaqanka Wanaagsan (Learning for Land Tool Development and Implementation A Good Practice Guide)
- UN-Habitat (2012) Buuga Tilmaanta Qiimeynta Baahiyaha Tababarka iyo Qiimeynta Natiijada Tababarka ee Mowduuca Magaalada (Manual Training Needs Assessment and Training Outcome Evaluation in an Urban Context)

## Ku saabsan Shabbakada Caalamiga ah ee Qalabka Dhulka

Shabbakada Caalamiga ah ee Qalabka Dhulka (GLTN) waa isbeddel firfircoon iyo isbaheysi qaybo badan oo iskaashato calami oo ay ka go'an tahay kordhinta helitaanka dhulka iyo damaannada muddada degnaanshaha dhamaan, iyada oo si gaar ah diiradda loo saarayo dadka saboolka,

dumarka iyo dhallinyarada. Wada-hawlgalayaasha shabbakada waxaa ka mid ah ururrada caalamiga ah ee bulshada rayidka miyiga iyo magaalada, machadyada cilmi barista iyo tababarka, ururrada laba gesoodka ah iyo iskaashatooyin dhinacyo badan leh, iyo hay'adaha xirfadlayaasha caalamiga. Ujeeddada Shabbakada Caalamiga ah ee Qalabka Dhulka waa horumarinta aaladaha loo dhan yahay sida xeerarka dagan, hababka iyo habraacyada, waxyaabaha muhiimka ah ee la xiriira dhulka. Waxay ay aaladahaan ku horumarisaa qaybaha soo socda:

| **Aaladda dhulka** | **Sharraxaad** |
|---|---|
| **Helitaanka dhulka iyo damaannada muddada degnanshaha** | |
| 1. Joogtaynta xuquuqda dhulka | Wuxuu aqoonsan yahay heshiisyada baaxadda wayn ee degnaanshaha oo u dhexeysa xadgudubyada rasmiga ah, shatiyada shakhsiyadeed ee hantida gaarka ah ee hal dhinac, iyo mid aan rasmi ahayn, oo ay bulshada maamusho, xuquuqda bulshadeed ee dhulka ee dhinaca kale. |
| 2. Tirinta ka-qaybgalka | Dadka gudaha ayaa xog ka uruurinaaya degmooyinkooda, lahaanshaha iyo qaabka degnaanshaha, iyo kaabayaasha iyo adeegyada. |
| **Maamulka dhulka iyo macluumaadka** | |
| 3. Cutubka Degnaanshaha Dhulka ee Bulshada | Fikrad, tusaale iyo aalad (software) diwaangelinaysa 'dadka – dhul' cilaaqaadka ka madaxbannan heerka rasmiga, sharciga iyo saxnaanta farsamada. Waa takhasuuska heerka la ansixiyay ee ISO ee Cutubka Maamulka Degmada Dhulka (LADM). |
| 4. Kharashka iyo maalgelinta adeega maamulka dhulka | Qaab-dhismeedka go'aan qaadashada ee la xiriira dib-u-habeynta dhulka, wuxuu ka caawiyaa in la garto qiimaha go'aannada iyo taakuleynta hababka ujeeddada leh; aalad taageerta go'aaminta kharashka, maalgelinta iyo qaabeynta mashruuca adeegyada maamulka dhulka. |
| 5. Daahfurnaanta maamulka dhulka | Xirmooyinka tababarka loogu talagalay hoggaamiyayaasha maamulka dhulka si loo horumariyo daahfurnaanta loona la dagallamo musuqmaasuqa. |
| 6. Maamulka Dhulka ee Ujeeddada Leh | Waxay bixisaa hagid qaabaysan oo ku saabsan dhisidda qaab-dhismeedyada dhulka, sharciga iyo hay'adeed iyadoo lagu tageeraayo qaabeynta istiraatijiyado dalka u gaar ah oo loogu talagalay hirgelinta maamulka dhulka ee ujeeddada leh. Waxay ka kooban tahay falanqaynta iyo xeerarka shaqeynaya ee la-talinta si loo hirgeliyo soo-jeedinta. |
| **Maalgelinta ku saleysan dhulka** | |
| 7. Maalgelinta ku saleysan dhulka | Xirmo tababar oo loogu talagalay in hoggaamiyayaasha maamulka dhulka ay ku horumariyaan daahfurnaanta kuna dagallamaan musuqmaasuqa. |
| 8. Qiimeynta dhulalka iyo guryaha aan diwaangashneen | Waxay bixisa hagid qaabeysan oo ku saabsan dhisidda qaab-dhismeedyada dhulka, sharciga iyo hay'adeed oo lagu tageerayo qaabeynta istiraatijiyo dalka u gaar ah oo loogu talagalay hirgelinta maamulka dhulka ee ujeeddada leh. Waxay ka kooban tahay falanqeynta iyo xeerarka shaqeynaya ee la-talinta si loo hirgeliyo soo-jeedinta. |
| **Maareynta iyo qorsheynta dhulka** | |
| 9. Ka-qaybgalka iyo dib u habeynta dhulka loo dhan yahay | Qaab dib loogu habeynaayo lahaanshaha iyo in la isticmaalo degmooyinka dhulka burburay ee gudaha iyo kuwa ku harereysan magaalooyinka si horumarka loo ogalaado, dib u habeynta iyo sharciyeynta xaafadaha isku raranta ah; waxay isu keenaysaa dhulal ay leeyihin milkiilayaal kala duwan iyadoo ka dhigeysa hal dhul oo loogu talagalay qorsheynta iyo bixinta kaabayaasha dhaqaale. |

| | |
|---|---|
| 10. Qorshaynta isticmaalka dhulka ogalaanshaha ku xiran | Hagidda sida loo horumariyo amniga ogalaanshaha dhulka iyadoo loo maraayo qorsheynta isticmaalka dhulka; oo uu xoojinayo xirmo elektronig oo tageerayso isku duwidda, isku dubarididda aqoonta, waxbarashada wax ku oolka ah iyo faafinta aqoonta. |
| **Siyaasadda iyo sharci dejinta dhulka** | |
| 11. Sharciyeynta qaab-dhismeedka loogu talagalay jilayaasha aan dowliga ahayn | Hagid bixinaayso qaab macquul oo lagu dhisi karo farsamooyinka jilayaasha aan dowliga ahayn iyo in go'aan qaadayaasha ku hawlan waaxda dhulka, oo ay ka mid yihin dawladaha qaran, hay'adaha hirgelinta ee labo geesoodka iyo hay'adaha dhinacyada badan lagu wargeliyo , jilayaasha aan dawliga ahayn iyo waxyaabaha ay ku soo kordhinayaan geedi socodka dib u habeynta dhulka. |
| 12. Horumarinta siyaasadda dhulka ee bartilmaameysanaysa saboolka | Hagid sharraxaayo geedi socodka ka-qaybgalka ee lagu dejinaayo siyasadaha la xiriira dhulka; waxaa lagu waafajin karaa si ku habboon xaaladaha gaarka ah ee dalka; loogu talagalay wasiirada iyo sharci dejiyayaasha sare oo u xilsaaran arrimaha dhulka, deeq-bixiyeyaasha, xirfadlayaasha, la-taliyayaasha, iyo Hay'adaha Aan Dawliga Ahayn ku hawlan dejinta sharciyada dhulka. |
| 13. Qaabka isku duwidda waaxda dhulka | Hagidda sidi loo dhisi lahaa waax wax ku ool ah ee dhulka iyo isku dubbaridka jilayaasha kala duwan ee waaxda dhulka; waxay sidoo kale soo bandhigayaan habab macquul ah oo lagu gaaraayo habraacyada is waafajinta hay'adaha. |
| **Arrimaha dhinacyada oo dhan taabanaaya** | |
| 14. Jinsiga | Shuruudaha iyo xeerarka loogu talagalay xirfadlayaasha si loo xaqiijiyo baahiyada haweenka ee helitaanka dhulka waxaa si wanaagsan looga hadlay barnaamijka, iyo sidookale ragga. |
| 15. Dhallinyaro | Shuruudaha lagu qiimeyo sida barnaamijyada dhulka ay waxqabad ugu leeyihin baahiyaha dhallinyarada si loo hubiyo inay ka faa'iideystaan. |
| 16. Dhul iyo iskudhac | Xeerarka sida wax looga qaaban laha arrimaha dhul wareegga ee isku dhaca. |
| 17. Dhul iyo musiibo<br>18. Kormeerka iyo tilmaamayaasha dhulka | Tilmaamaha iyo habab lagu kormeerayo xaaladda arrimaha la xiriira dhulka, isbabar dhiga waddamada iyo nidaamka kireysiga dhulka. |
| 19. Aasaaska | Cutubka, xeerarka iyo xirmada tababarka ee awood u sinaysa ka-qaybgalka dadka maxalliga ee hindisaha la xiriira dhulka. |
| 20. Hababka dhulka ee Islaamka ku saleysan | Xirmada tababarka ee ku saabsan dhulka, hantida iyo xuquuqda guryeynta ee Caalamka Islaamka iyo mabaadi'da aasaasiga iyo qodobada dhinacyada Islaamka ee dhulka; oo loogu talagalay bixinta fahan ballaaran oo ku saabsan sidi dhinaca Islaamka loogu soo dari lahaa mashaaricda iyo barnaamijyada dhulka. |

Wixi maclumaad dheeraad ah booqo www.gltn.net

# Cutub 1-aad. TAARIKH KOOBAN OO KU SAABSAN ARRIMAHA DHULKA EE GOBOLKA SOOMAALIYA

Cutubka koobaad wuxuu caddeynaya arrimaha adag ee dhulka ee Gobolka Soomaaliya ee ka soo baxay maqnaanshaha siyaasad dhuleed iyo qaab-dhismeedka sharciga. Ujeeddada cutubkaan waa in taarikh kooban oo ku saabsan maamulka hadda jira ee dhulka iyo dhaqannada maamul ee Gobolka Soomaaliya si loo bixiyo isfahan guud oo ku saabsan asalka dhulka oo lagu horumarinaayo manhajka tababarka. Arrimaha dhulka ee Soomaaliya waxaa lagu saadaalinayaa arrimo dhowr oo gacan ka gaystay nidaamka hadda jira ee maamulka dhulka. Qaar ka mid ah arrimahaas ayaa hoos ku xusan.

## 1.1. Maamul daciif ah iyo sharciyo badan

“Maamulka dhulka ayaa la xiriira qawaniinta, geedi socodka iyo qaab-dhismeedka lagu gaaro go’annada ku saabsan helitaanka iyo isticmaalka dhulka, qaabka go’aannada loo fuliyo loona dhaqan geliyo, iyo sida loo maareeyo danaha kala duwan ee dhulka[1]”. Dhulka iyo helitaankiisa, isticmaalkiisa iyo maamulkiisa waa qayb muhiim u ah joogtaynta horumarka bulshada iyo dhaqalaha, Nabadda iyo xasilloonida, iyo xaqiijinta xuquuqda aadanaha[2]. Soomaaliya, dhulka waxaa xukuma oo maareeya nidaam adag ee **hay’adaha dawliga, madaxda dhaqanka iyo diinta, iyo dhaqamada bulshada.** Dhibaatadaan, waxaa sii xumeeyay waajibaadka oo aan la caddeynin, doorarka iyo mas’uuliyadaha, daldaloollada dhanka awoodda iyo nidaamyada sharciga daciifka ah oo horseeday maamul daciif ah ee dhulka. Gobolka Soomaaliya, oo ay ka mid tahay waaxdeeda dhulka, waxaa maamulo **nidaam sharci ahaaneed oo wadajir ah** halkaas oo sharciyada la dhaqan geliyay, sharciyada dhaqanka iyo sharciga Islaamka ay iswaafaqaan islana shaqeeyaan, kuwaas oo horseedaayo **dhaqanno isdaba joog ah** oo guud**,** kuwaas oo umuuqda inay ka kooban yihin qaybta ugu adag ee nidaamka dowladnimo ee fudud.

Sida ku xusan **sharciga dhaqanka,** dhulka waxaaa loo arkaa wax muqaddas oo wanaagsan iyo astaan awood oo laga dhaxlay awoowayaal oo bulshada dhan ay leeyihin. Dadka waxay xaq u leeyihin inay dhulka isticmaalaan tan na waxaa lagu wareejin karaa walidiinta illaa iyo caruurta ama waxaa bixin kara odayaasha bulshada, kuwaas oo ah maamulayaasha dhaqanka ee dhulka. Odayaasha sidookale waxay leeyihin xaq ay ku xalliyaan khilaafaadka la xiriira dhulka ee u dhexeeya qabaa’ilka iyo qabaa’illada hoose iyagoo ciyaaraayo hawsha muhiimka ee maamulka dhulka ee xallinta khilaafka dhaqan ee dhulka[3]. **Sharciga Islaamiga (ama Shariicada)** waa nidaam xeerar diimeed oo laga soo qaatay Quraanka iyo Axaadiista; waxay leedahay awood xoog badan waxayna ka ixtiraam badan tahay sharciga dhaqanka, inkastoo, lagu daabaqo qaab qiyaas ah. **Sharciga la dhaqan geliyay** waa sharci la habeeyay oo ay soo saareen hay’adaha dawliga ah ee rasmiga ah, hannaan weli ku jiro isku dhafid iyo dib u eegis oo ay sidoo kale sabab u tahay isbeddelki dhowaan lagu sameeyay Soomaaliya ee lagu beddelay dowlad federaal ah. Sharciga wadajirka ah ee Soomaaliya wuxuu bixiyaa meelo dhowr hab oo laga soo galo si loo xoojiyo damaannadda muddada degnaanshaha ee heerar kala duwan iyadoo loo maraayo habka joogtaynta xuquuqda dhulka.

[1] UN-Habitat/FAO (2009) Dhanka Horumarinta Maamulka Dhulka (Towards Improved Land Governance.)

[2] UN-Habitat, GLTN (2017) Maamulka dhulka: dib u eegis iyo falanqeyn ku saabsan qaab-dhismeedka caalamiga ee muhiimka ah. (Land-governance: a review and analysis of key international frameworks.)

[3] UN-Habitat/IOM (2017) Muqaalka Magaalada Kismaayo. Waraaqaha Shaqada iyo Falanqaynta Joqraafiyadeed ee Wadatashiyada Qorsheynta Magaalooyinka iyo Xalalka Waara ee Dhibaatooyinka Barakaca. (Kismayo Urban Profile. Working Paper and Spatial Analyses for Urban Planning Consultations and Durable Solutions for Displacement Crises.)

**Xuquuqda dhulka iyo hantida ee Islaamka**

Marka loo eego aragtida Islaamka, Dowlad ayaa dhinaca maareynta loo arkaa in uu kormeeraayo dhul uu ugu dambeynti Ilaahay leeyahay, iyadoo loo daneynaayo bulshada. Dowladda waxaa waajib ku ah inay maamusho dhulka, si hufan oo cadaalad ah, iyadoo la racaayo shuruucda Ilaahay iyo mabaadi'da anshaxa iyo akhlaaqda.

Xuquuqda hantida ee Islaamka waa shuruud lagama maarmaan u ah in guryaha aan loo isticmaalin si xad dhaaf ah ama six un looga faa'iideysanin ama qaab dadka kale ay ku waynayaan hantida ay sida cadaalada ah ku heleen. Lahaanshaha dhulka ee Islaamka waxay ku saleysan tahay in dhulka loo adeegsado si wax soo saar leh sida lagu caddeeyay mabd'a lahaanshaha dhul madhan (*mewat*) iyadoo loo maraayo dib u habeyn. Xuquuqda dhulka ayaa sidaas darteed, ku xiran isticmaalka dhulka. Qofka isticmalaayo dhulka wuxuu lahaan doonaa mudnaan ka sareysa qofka haysta qayb dhul ah balse aan isticmaalin. Dhul aan lagu shaqeysan mabd'a ahaan lama lahaan karo. Sidaas darteed, mabaad'ida Islaamka saameyn muhiim u ah surtagalnimada helitaanka dhulka iyo degnaanshaha sugan.

*Asalka: UN-Habitat, GLTN (2010) Koorsada tababar oo ku saabsan dhulka, hantida iyo xuquuqda guryeynta ee dunida Islaamka. (A training course on land, property and housing rights in the Muslim world.)*

## 1.2. Xuquuqda dhulka oo aan caddayn

Dood-wadaagyada lala yeesho ila wareedyada muhiimka inta badan waxaa had iyo jeer lagu xaddida qodobadi Sharciga Dhulka ee 1975-tii oo ay dejisay dowladdii Siyaad Barre, kuwaas oo weli ay ka kooban tahay sharciga guud ee aasaasiga ah ee xuquuqda dhulka ee hadda jira. Sida ku xusan sharciga la sheegay, lahaanshaha iyo xakameynta dhulka waxaa lagu wareejiyay dowladda. Sharciga ayaa shakhsiyaadka dhamaan ku qasbay inay muddo lix bil laga bilaabo dhaqangelinta sharciga diwaangeliyaan lahaanshaha dhulkooda. **Sharciga dhulka ee 1975-tii wuxuu si rasmi ah u ciribtiray dhaqanka dagnaanshaha dhulka,** kaas oo lagu beddelay lahaansho dowladeed oo magac kaliya ee lagu dacwoodo xuquuqda dhulka[4], taas oo Soomaali badan ku kalliftay wax aan rasmi ahayn. Xilliga sharciga dhulka ee 1975-tii, Soomaaliya waxay raaci jirtay hannaan dhaqaale oo hanti wadaag kaas oo wargeliyay siyaasadaha lahaanshaha dhulka ee Dowladda ee jiray. Marka la dejinaayo siyaasadda, waxaa muhiim ah in la ogaado in nidaamyada dhaqaalaha ay wargeliyaan siyaasadaha iyo shuruucda. Maanta, dhaqaalaha iyo suuqa xorka ah ee Soomaaliya wuxuu aqoonsadaa lahaanshaha shakhsi ahaaneed iyo dhulka waxaa loo isticmaali karaa aalad waxtar u leh in lagu kobciyo horumarka dhaqaalaha.

Ficil ahaan, inkastoo la dhaqan geliyay Sharciga Dhulka ee 1975-tii, **dhulalka intooda badan ma diwaan gashna** maadaama ay jiraan caqabado kala duwan oo la xiriira kharashka iyo hannaanka maamul ee la xiriira diiwaangelinta dhulka. Dhulka la diwaangeliyay wuxuu inta badan ahaa mid ku yaalo xarumaha magaalooyinka, ama dhulal dhul beereed ah oo loo isticmaalo wax soo saarka dalaga beeraha iyo dhoofinta (loogu talagalay maalgashi halki quudka), caqabad aan illaa iyo manta is beddelin. Hawsha diiwaangelinta ayaa jawaabcelin fiican ka bixisay baahiyaha dadka dabaqadda sare ee magaalooyinka balse lama jaanqaadin shuruudaha casriga ah ee loo dhan yahay iyo caddaalada. "Diwaangelin yar oo ay sameeyeen beeralayda maxalliga iyo, nasiib darro, tiro aad u badan (oo diwaangelin) oo ay sameeyeen dad dibedda ka yimid oo xiriir dhow la leh dad la yaqaano" ayaa dhacay[5]. Hannaanka diiwaangelinta dhulka waxaa lagu garan jiray **musuqmaasuq, daahfurnaan la'aan iyo tageerada maamul ee dhulka oo aad u yar**.

[4] UN-Habitat (2018) Haweenka iyo Dhulka ee Dunida Muslimka: Waddooyinka loo maro kordhinta helitaanka dhulka ee xaqiijinta horumarka, nabadda iyo xuquuqda aadanaha. (Women and Land in the Muslim World: Pathways to increase access to land for the realization of development, peace and human rights.)

[5] Norton, G. (2008) Dhulka, Hantida iyo Guryiyenta Soomaalida. (Land, Property and Housing in Somalia.)

Nidaamka diwaanka dhulka ee Siyaad Barre waxaa weli loo arkaa isha ugu kalsoonida badan ee aaminka ah ee dokumentiyada xuquuqda dhulka. Iyadoo lagu saleynaayo wareysiyada lala yeeshay saraakiisha muhiimka ah ee dowladda iyo ilaha kale ee muhiimka ah, diiwaannada dhulka ee xilligi Siyaad Barre ayaa ah isha ugu muhiimsan oo si muran la'aan laga heli karo dokumentiyada dhulka ee caddeynaya lahaanshaha dhulka. Dowladihi xige ayaa **waxaa ka maqnaa sharci ahaanshaha loo baahnaa** dokumentiyada dhulka ee la bixiyay ma aysan ahayn heer ansaxnimo ee la mid ah kuwi la bixin jiray xilligi dowladdii Siyaad Barre. Sababo la xiriira dagaalada daba-dheeraaday ee ka dambeeyay markii ay dhacday dowladdii Siyaad Barre ee 1991-dii, diiwannada dhulka ee xilligaas la bilaabay ayaa qeexaya waxa illaa iyo hadda lagu tilmaamo “dhul diiwaangashan,” halka inta soo hartay na lagu tilmaamo “dhul aan diiwaangashnayn.” Dagaalki sokeeyay kaddib, sarkaal dowladeed oo gacanta ku haayay dokumeentiyadii diwaanka dhulka iyo shatiyada lahaanshaha dhulka ayaa dokumeentiyadii asalka ahaa ula cararay Yurub. Kaddib waxay noqotay caado in kuwa leh awood dhaqaale ay dib u iibsadaan shatiyada lahaanshaha dhulka si ay ugu adeegsadaan caddayn dokumeynti inta ay socoto dacwadda sharciyeed. Xaqiiqdi, heerkaan burburka hay'adaha wuxuu horseeday in dadka aad loo takooro iyo in la horumariyo dadka aqoonta leh ee awoodda u leh inay wax helaan.

**Muwaadiniinta ayaa intooda badan dagan dhul aan diwaangashnayn**, iyagoo aan haysanin dokumeynti caddaynaya lahaanshaha dhulkaas. Qaar badan oo ka mid ah **degsiimooyinka nocaan oo kale waxay ka soo baxaan goobo aan habbonayn** oo aan haysanin adeegyada lagama maarmaanka oo aan habnololeed laheen. Haddii an qorshe degmo dhan la sameynin oo ay degsiimooyinka nocaan lagu darin xaafadaha caadiga ah ee magaalada, waxay noqon doonaan xaafado isku rarran ah oo magaalo iyo miyi u dhexeeyo. Baahida loo qabo qorshe istiraatijiyad horumarineed oo dhul waa mid aad u muuqda.

## 1.3. Nidaamka diiwaangelinta dhulka

Diiwaangelinta dhulka ayaa ah dhibaatada ugu daran ee lagu xallin doono muddo gaaban, oo labo arrimood oo muhiim ah ay sabab u yihin: furitaanka awoodda bulshadeed iyo dhaqaale ee magaalada iyo dhul beereedka iyo helitaanka sharciga ee dhanka dadweynaha. **Degnaanshaha, iibka, iyo sii iibinta guryaha** ayaa tan iyo 1991-dii adkeysay in la bixiyo lahaanshaha asalka ah. Milkiilayaasha asalka ah ee dhulalka oo qurbaha ku geeriyooday ayaa horseeday in ehelada soo haray **intooda badan ay sheegtaan lahaanshaha dhulka**. **Dokumeentiyada been abuurka ah** waa mid soo jireen ah, sidaas daraadeed haysashada shatiga lahaanshaha dhulka ma xaqiijinaayo lahaanshaha. Nidaamka noocaan oo shaqeynaynin ee diwaangelinta dhulka waxaa sii xumeeyay dhaqanka caanka ah ee **dagnaanshaha sharci darrada ah ama boobka dhulka**. Dadka booba dhulalka waxay inta badan isticmaalaan milkiyadooda been abuurka ah si ay u iibiyaan dhulka oo dhinac saddexaad ‘si sharci ah’ uga iibsado, iyagoo abuuraayo xaalad cakiran ee sheegashada dhulka iyo xuquuqda dhulka: oo horseedayso isku dhacyo.

### Burcadda booba dhulalka

Burcadda dhulka waxaa loo habeeyay saddex koox, mid walbana wuxuu leeyahay hawl gaar ah. Kooxda koobaad, afka Soomaaliga waxaa loo yaqaanaa *indha indheeyayaal ama dhegadhegeyayaal* (aqoonsashada iyo aruurinta macluumaadka), waxay ku yaallaan meelo kala duwan iyo tullooyin ku yaallo Kismaayo. Hawsha guud ee kooxda waa inay aqoonsadaan dhulal banaan. Marka ay aqoonsadaan dhulalka bannaan, kooxda waxay ku dhaqaaqdaa uruurinta macluumaadka khuseeya.

Macluumaadka la soo uruuriyay ayaa markaa loo gudbiyaa kooxda labaad, oo caadi ahaan ka kooban dad leh khibrad militari. Dadka noocaan waxaa ka mid ah saraakiishi booliska iyo ciidanki hore ee shaqada ka

fadhiistay. Kooxda waxay hoggaamisaa hawlgallada la xiriiro qabsashada dhulalka la bartilmaameystay. Marka ay qabsadaan dhulka, kooxda saddaxaad ayaa meesha soo gasho. Waxaa loo yaqaanaa *ili ma aragto* (kooxda aan la arkin). Kooxdaan waligood laguma arko nooc ka mid ah muranka dadweynaha oo ku saabsan dhulka laga hadlaayo. Shaqadoodu waa inay maalgeliyaan hawlaha kooxda koobaad iyo tan labaad. Sida caadiga waxay ka kooban tahay ganacsato, dadka iibiya *qaadka* gaar ahaan haweenka iyo qaar ka mid ah saraakisha sarsare ee ka tirsan hay'adaha dowladda iyo militariga. Kooxda maalgelinaysa waxay mas'uul ka tahay bixinta kharashka lagu horumarinaayo dhismaaha dhulka, oo ay ka mid yihin dhismaha guri jiingad, derbi lagu wareejiyo guriga ama taallo, iyo kharashaadka diyaarinta dokumeentiyada dhulka ee been abuurka ah. Hal ku dhigga burcadda dhulka waa *"dhul ninkii dhistaa leh"*: dhulka waxaa iska leh qofkii maalgashaday ama shakhsi ahaan dhisay.

Kooxahaan ayaa inta badan booba dhul aan diiwaangashneen (*obosibo*). Waxaa had iyo jeer dhacda in kooxaha burcadda noocaas ay iyagu isu marqaati furaan markii muranka dhulka la heshiisinaayo. Iyagoo ka baqaaya aarsasho dad hubeysan, xubnaha bulshada ayaa inta badan dooneynin inay bixiyaan caddeyn ka dhan ah burcadda dhulka. Inta badan, dhulka la boobo waxaa iska leh haweenka, kooxaha laga tiro badan yahay iyo milkiilayaasha maqan ee aan Kismaayo dagneen ama dibadda ku nool. Dib u soo celinta dhulkaas ayaa inta badan adag marka la raacaayo fikradda guud ahaan la aqbalay ee "dhul ninkii dhistaa leh."

*Asalka: UN-Habitat, GLTN (2018) Sababta asalka ah ee Isku dhaca Dhulka ee Jubbaland. Falanqaynta iyo Talooyinka. (Land and Conflict in Jubaland Root Cause. Analysis and Recommendations.)*

## 1.4. Hay'adaha sharciga ah ee maamulka dhulka

Qoraallada yar ee jira oo ku aaddan maamulka dhulka ee Soomaaliya ayaa muujinaaya in guud ahaan nidaamyada daciifka ah iyo caqabadaha badan ee dhulka sida baahida loo qabo daahfurnaan iyo hubsiimada xukunnada degnaanshaha dhulka[6]. Hay'ado badan oo **dowladeed ayaa weli daciif ah ama haysanin sharci,** oo ay ka mid yihin kuwa doorka ku leh maamulka dhulka. Qaar ka mid ah waxyaabaha sababa in hay'adaha ay daciifaan waxaa lala xiriiriya **xaaladda siyaasadeed** ee dalka, daciifnimo kale ayaa ka dhalatay hay'ado gaar ah oo ay ka mid yihin **inaysan jirin doorar iyo wajibaad muqda** ee hay'adaha dawliga ah ee kala duwan ee federaalka, gobolka iyo degmooyinka; a**wood daciif ah iyo kheiraad la'aan.** Weli lama caddeynin wixi la go'aamin lahaa iyo sharciyada lagu dejiyay heer federaal, gobol ama degmo oo ku aaddan dhulka.

Intaas waxaa u sii dheer, in colaadda daba dheeraatay ay in dhowr meelood ee dalka ah ay ka dhalisay in **Dowladda ay beddeleen** noocyo kala duwan oo kooxoho hubeysan oo go'an qaadashada oo ay ka mid tahay maamulka dhulka. Awoodda siyaasadeed iyo tan militari, ayaa inta badan lagu muujiyaa aqoonsi qowmiyadeed, oo beddelay dowladda oo ahayd xarunta go'aan qaadashada[7]. Is beddellada dhulka waxaa inta badan lagu soo rogaa in la beddelo nidaamyada dowladnimo oo doorbido qabaa'illada ay ka soo kala jeedaan (ama kooxaha), iyagoo danaha kooxo gaar ah u adeegsanaayo aaladaha dowladda. Ujeeddada ayaa ahayd in 'lagu xukumo qabaa'lka' si ay uga fa'iideystaan iyo inay boobaab dhulka diiwaangashan ama aan diiwaangashneen, dhulka dowladda iyo meelaha kale ee furan.

[6] Burman, J., Bowden A. and Gole A. (2014) Muddada Dagnaanshaha Dhulka ee Soomaaliya: Aasaas Suurtagal ah oo Loogu Talagalay Amniga iyo Barwaaqada. (Land Tenure is Somalia: A Potential Foundation for Security and Prosperity.)
[7] Machadka Rift Valley (2017-ki) Arrimaha Dhulka ee Muqdisho. Degnaanshaha, lahaanshaha iyo barakaca magaalo muran ka taagan yahay. (Rift Valley Institute (2017) Land Matters in Mogadishu. Settlement, ownership and displacement in a contested city.)

**Qabiillada**

Hadalka rasmiga wuxuu soo bandhigaaya in dadka Soomaaliyeed ay yihiin dad ka kooban afar qabiil oo waa wayn: Dir, Daarood, Digil & Mirif iyo Hawiye, oo u kala qaybsamo qabiilo hoose, qabiilo sii hooseeyo,iwm. Koox shanaad, oo ay ka kooban yihin dhowr qabiilo oo laga tira badan yihin, ayaa dhameystiraaya tirada. Qaab-dhismeedka noocaan, oo uu sharciyeeyay dastuurka cusub ee Federaalka, wuxuu lug ku leeyahay sida xilalka awoodaha muhiimka ah ee hay'adaha dowladda loogu wadaago qaba'iillada kala duwan. Qaabkaan ku saleysan qabiilka waa qaab cusub oo siyaasadeed iyo dowladnimo la dhisaayo, haddana aan weli kobcin oo aysan jirin boos dib-u-eegis joogta ah iyo cusboonaysin.

Caddeymaha laga helo qoraallada ayaa muujinaaya in siyaasadda qabiilka ay tahay dhacdo calami ah oo isku muujisa dhinacyo kala duwan oo nolosha oo ay ka mid yihin noocyadii hore iyo kuwa hadda jira ee khilaafaadka dhulka. Shaki la'aan, dabeecadda caalamiga ee arrimaha qabiilka waxa ay ka muuqata xaalladaha magaalooyinka iyo miyiga. Arrimaha qabiilka ayaa inta badan go'aamiya sida degsiimooyinka loogu abaabulo magaalooyinka, iyadoo dadka door bidaan inay degaan xaafadaha qabiilka ku saleysan.

Burburka hay'adaha dowladda iyo sanadihi colaadda ayaa horseeday xaalad ah in maamulka dowladda uu si tartiib tartiib u yaraaday illaa u qabiilka beddelay dowladda oo ahayd maamulka ugu saameynta badan ee shacabka dhexdiisa. Marka loo eego xaaladdaan, aqoonsiga qabiilka iyo siyaasadda la xiriirta ayaa qaadaya ahmiyad aad u badan oo si joogta ah loo adeegsado, kobcinta kala qaybsanaanta qabiilka ku saleysan iyo taarikhda ku saleysan qabiil oo xoog badan ee xagga horumarka iyo bulshooyinka samafalka ah. Dhaqdhaqaaqyada qabiilka ayaa muhiim u ah aragtida khilaafaadka dhulka iyagoo qaadanaayo door dhexe ee dhismaha nabadda iyo maareynta khilaafadka.

*Asalka: UN-Habitat, GLTN (2018) Sababta asalka ah ee Isku dhaca Dhulka ee Jubbaland. Falanqaynta iyo Talooyinka. (Land and Conflict in Jubaland Root Cause. Analysis and Recommendations.)*

## 1.5. Siyaasadda ka saaridda

Siyaasadda ka saaridda waxay muhiim u tahay sababta asalka ah ee isku dhacyada ku saleysan dhulka oo ku sii kobci karo daciifnimada maamulka iyo maareynta dhulka oo kor lagu sheegay. Hal tusaale oo sharraxaaya siyaasadda ka saarista waa **dhul ka saaristi** la sameeyay xilligi Siyaad Barre. Sharciga 44-aad ee Dhulka ee 1975-tii ayaa si wanaagsan u tirtiray **muddada dagnaanshaha dhaqanka** wuxuuna dhamaan milkiyadda dhulalka ku wareejiyay dowladda isagoo abuuraayo shuruudaha hannaanka diiwaangelinta dhulka oo aad u anfacaayo dadka ugu caansan magaalooyinka iyo maalgashadayaasha waaweyn ee miyiga iyadoo ay ku khasaareen qaybaha ballaaran ee bulshada. Beeralayda yar yar **ayaa ka mid ah qaybaha ugu muhiimsan ee dhulalka laga qaatay taas oo ay sabab u tahay siyaasadda ka saarista.** Siyaasadda ka saarista ayaa sii socotay kaddib burburki dowladdii Siyaad Barre, marki awoodda dowladdu ay si tartiib ah u dhacday illaa uu **qabiilka beddelay dowladda** oo ahayd maamulka ugu saameynta badan ee shacabka dhexdiisa, iyadoo ay aad u caddaayeen khasaarooyinka qabiillada iyo kooxaha laga tiro badan yahay.

**Qaab loo wada dhan yahay: sii joogtaynta xuquuqda dhulka**

Qaabka loo abaabulay muddada degnaanshaha dhulka ee Gobolka Soomaaliya ayaa inta badan lagu sharraxaa ereyo is diidan: sharci ah/aan sharci ahayn, diiwaangashan/diiwaangashneen, xaq loo leeyahay (de jure)/la dhaqan geliyay (de facto), taas oo sii xumeeynaysa siyaasadda ka saarista. Hasa ahaatee, noocyo ballaaran oo adag ee muddada degnaanshaha dhulka ayaa ka dhexeeya xuduudahaan iyo xuquuqda dhulka waxaana loo arki karaa sii joogtayn u dhexeysa xuquuqda aan rasmiga ahayn iyo kuwa rasmiga ah.

Sii joogtaynta xuquuqda dhulka waa qaab loo wada dhan yahay oo ay ka mid tahay xuquuqda muddada degnaanshaha oo sharciyeysan iyo kuwa aan sharciyeysneen, rasmi ah iyo sidookale aan rasmi ahayn, shakhsiyaadka iyo sidookale kooxo, oo ay ka mid yihiin xoolo dhaqatada iyo dadka daggan xaafadaha isku raranta iyo degsiimooyinka kale, kuwaas oo noqon kara kuwa sharci ah ama aan sharci ahayn. Sii joogtaynta habka loo maro xuquuqda dhulka ayaa ku talinayso aqoonsiga iyo xoojinta horumarinta abaabulka habboon ee la ansixiyay ee muddada dagnaanshaha dhulka oo ka jira xaalad gaar ah oo waxtar leh duwan, la cabiri karo iyo waqti wax ku ool ah oo lagu horumariyo waqtiga ugu gaaban oo ay dhamaan ku heli karaan dhul. Qaabka ugu habboon ee loo aqoonsado xuquuqda lahaanshaha dhulka waxay ku xiran tahay duruufaha, waxa ku habboon baahiyada bulshada, dhaqanka iyo dhaqaalaha bulshooyinka maxalliga ah, waa maxay awoodaha jira ee aqoonsiga iyo maareynta xuquuqda noocaas iyo shuruudaha mas'uuliyiinta maamulka dhulka. Xuquuqda la aqoonsaday, ayaa waqti kadib si tartiib tartiib ah loo horumarin karaa, iyadoo loo maraayo qaabab kordhin ah.

Marka laga hadlaayo xaaladda Gobolka Soomaaliya, ha ahaato mid rasmi ah iyo mid dhaqameedba, aqoonsiga noocyada ugu caanka badan ee muddada degnaanshaha dhulka waa in la sameeyo iyadoo loo maraayo qaab ka wada qaybqaadasha ah oo ay ku jiraan dhamaan daneeyayaasha muhiimka ah. Tan waxay u oggolaanaysaa in la aqoonsado noocyada muddada degnaanshaha dhulka la aqoonsan karo laguna nidaamin karo siyaasadda, qaab-dhismeedka sharciyeed iyo midka hay'adeed.

*Source: UN-Habitat, GLTN (2018) Land and Conflict in Jubaland Root Cause. Analysis and Recommendations.*

## 1.6. Barakacayaasha iyo dadka dib u soo laabtay

Guuritaanka ikhtiyaariga ah iyo midka aan ikhiyaariga ahayn waa astaanta asalka ah ee bulshada Soomaaliyeed. Dhaqdhaqaaqyada qasabka ah oo ay sababeen colaadda iyo soo laabashada musiibooyinka dabiiciga ah sida abaaraha iyo gaajada, ayaa dhaliyay dhibaatooyin weyn oo la xiriira helitaanka dhulka iyo amniga muddada degnanaanshaha dhulka ee qaybaha kala duwan ee dadka barakacay oo si ballaaran loogu aqoonsan karo Dadka Gudaha Ku Barakacay (IDPs), dadka dib u soo laabtay, qaxootiga iyo muhaajirinta. Mid kasta oo ka mid ah qaybahaan waxay leeyihiin isu ekaansho iyo kala duwanaansho marka loo yimaado caqabadaha la xiriira helitaanka dhulka iyo kuwa la xiriira isku dhacyada, oo ay sii adkeysay saboolnimada iyo xiriirka ay la leeyihiin 'bulshooyinka martigeliyay', ama bulshooyinka awoodda leh. Isdhexgalka bulshada, dhaqaalaha iyo dhulka Dadka Gudaha Ku Barakacay ayaa inta badan ka suurtogali wayday Gobolka Soomaaliya "sababaha (taasi) waxaa ka mid noqon kara inaysan haysanin damaanadda muddadan degnaanshaha dhulka ay ku nool yihin, inay ka tirsan yihin qowmiyado ama kooxo qabiileed kala duwan, **oo loo arko inay yihiin shisheeye,** ama sababta oo ah in maamullada maxalliga ah ay diyaar u yihiin inay siyaan 'meel ku meel gaar ah' laakin aan ahayn degnaansho rasmi ah."[8] Xitaa **haddii dad badan oo ka mid ah Soomaalida dib u soo laabtay** ay raadsadaan dhul iyagoo u maraayo suuq dhuleed sharci ah, waxay inta badan ugu dambeynti iibsadaan dhul aan diiwaangashneen oo u nugul in uu muran milkiyadeed ka dhasho taas oo ay sabab u tahay **shaqo xumida suuqa dhulka**.

---

[8] ReDSS (2016) Isdhexgalka Maxalliga oo Diiradda Lagu Saaraayo: Gobolka Jubbada Hoose. Dib-u-eegista qaab-dhismeedka xalalka waara ee xogta jirta iyo qiimeynta si loo garto daldaloollada iyo fursadaha si loogu wargeliyo (dib) isu dhexgelka qorsheynta iyo qabanqaabinta barakaca. (Local Integration Focus: Lower Juba Region. Durable solutions framework review of existing data and assessments to identify gaps and opportunities to inform (re)integration planning and programming for displacement.)

# Cutubka 2-aad. HORDHACA SIYAASAD LOO DHAN YAHAY

Cutubka labaad wuxuu soo bandhigaayaa fikradda iyo faa'iidooyinka "siyaasad dhulka oo loo dhan yahay" wuxuuna sahmiyaa caqabadaha siyaasadeed iyo kuwa farsamo oo laga yaabo in la wajaho inta laguda jiro horumarka iyo geedi socodka hirgelinta. Ujeeddooyinka cutubyadaan ayaa ah: furitaanka dood ku saabsan sababaha loogu baahan yahay siyaasad noocaas iyo arrimaha la doonaayo inay wax ka qabato; soo bandhigidda guudmarka caqabadaha la doonaayo in la tixgeliyo inta la dejinaayo siyaasad dhulka oo la dhan yahay.

## 2.1. Xulashada siyaasad dhuleed oo loo wada dhan yahay

Sida caadiga ah, iyo Gobolka Soomaaliya kama marno, waxaa jiro halis ah in siyaasadaha dhulka, shuruucda iyo habraacyada oo lagu takooraayo ama aan loogu faa'iideeynin saboolka, dadka awoodda yar, dadka laga tiro badan yahay iyo haweenka, xitaa haddii tan aysan ahayn ujeeddadi loogu talagalay. Dadka saboolka ah ayaa weli ku dhex jiro saboolnimada taas oo ay sabab u tahay inaysan heli Karin iyo isticmaali Karin dhulka ay u baahan yihiin si ay u beeraan dalagyo, u dhistaan guryo iyo inay ganacsi bilaabaan. Damaanadda degnaanshaha dhulka la'aanteed, ma heystaan dhiirigelinay ku maalgeliyaan dhulka. Qawaaniin badan oo dhulka, sida diwaangelinta qayb dhul ah ama in lagu wareejiyo milkiile cusub, aad ayay qaali ugu yihiin dadka saboolka ah. Sidaas darteed, dadka saboolka ah ee magaalooyinka deggan ayaa ku qasbanaado inay ku noolaadaan xaafadaha isku rarranta ah ee aan haysanin adeegyada aasaasiga sida bullaacadada, biyo socda iyo koronto. Dadka saboolka ee miyiga ayaa haysanin dhul daaq, keymo iyo biyo. Mana haystaan sabab ay uga hortagaan nabaad-guurka ama ay ku maalgashadaan waraabinta dhulkooda.

Tan waxaa sabab u ah in **geedi socodka horumarka siyaasadda** u takooro kooxaha awoodda yar. Waxaa ku badan aqoonyahannada: siyaasiyiinta, dano ganacsi, milkiileyaasha dhulalka, iyo khubarrada farsamada sida qareennada iyo sahmiyeyaasha. Dadka aan awoodda haysaninayaa leh saameyn siyaasadeed oo yar, mana haystaan aqoonta farsamo iyo kheyraad ay ku biiriyaan doodaha siyaasadda. Hawlaha siyaasadaha loo dhan yahay ayaa loo baahan yahay si looga hortago caqabahaan. Siyaasadaha noocaan oo kale waa inay tixgeliyaan islamarkaana dhisaan sii socoshada xuquuqda dhulka, xuquuqda dhulka oo kala duwan, oo ku habboon meelaha, baahiyaha iyo xaaladaha kala duwan. Waa inay xaqiijiyaan in qof kasta u dhul iyo adeegyada dhulka ku heli karo qiimo u awoodo. Waa inay bixiyaan damaanadda muddada degnaanshaha dhulka, ugu yaraan, iyagoo ka hortagaayo in dadka si sharci darro looga saaro guryahooda ku yaallo magaallooyinka iyo miyiga. Waa inay ku dadaalaan inay magdhow ka bixiyaan caddaallad darrooyinka ku qasbaayo in dad badan oo magaalooyinka deggan ay ku nooladaan dhul aan habboonayn oo la dayacay.

**Qaab-dhismeed siyaasadeed, sharci iyo maamul ku filan ayaa loo baahan yahay in la sameeyo.** Qaab-dhismeedyada noocaan waa in heer federaal lagu dhiso oo lala shaqeeyo midka gobolka ee ka hadlaaya arrimaha maamul hoosaadka iyo isla xisaabtanka. Waa inay wax ka qabtaan, si qooto dheer, arrimaha muhiimka u ah dhulka ee dalka ka jira: maamulka daciif ah, xuquuqda dhulka oo aan caddayn, maamulka isticmaalka dhulka, qorsheynta wax ku ool ka ah, maamulka iyo diwaangelinta dhulka, xallinta khilaafaadka dhulka, xuquuqda dhulka oo dhan, oo ay ka mid yihiin kooxaha laga tiro badan yahay, da' yarta, haweenka, dadka barakacay (Dadka Gudaha Ku Barakacay (IDPs), dadka dib u soo laabtay, qaxootiga, muhaajirinta,…) iyo dadka aan dhulka haysanin. Siyaasadaan waa inay wax ka qabato meelaha miyiga iyo magaalooyinka labaduba (ama waa in la dejiyo siyaasado gaar ah) iyo farsamo ahaan iyo sidookale caqabadaha xuquuqda aadanaha.

Hawlaha noocaan waxay u baahnaan doonaan waqti waana muhiim in **waqti ku filan iyo kheyraad** loo qoondeeyo. Shabbakada Caalamiga ah ee Qalabka Dhulka ee soo socda oo ku saabsan

horumarinta siyaasadda dhulka oo loo dhan yahay waxay ka caawin kartaa geedi socodka iyo is-weydaarsiga waxbarasho ee waddamada soo maray leyliyada noocaan ee xaaladaha isbarbar dhiga ayaa dhici kara. Dhanka kale, **waxqabadyo kale oo muddo gaabaan iyo muddo dhexdhexaad oo heer gobol iyo heer maxalli labaduba** ayaa la dhisi karaa, iyadoo loo diyaargaroobaayo inay dhacdo siyaasad iyo dib u habayn sharciyeed iyo in wax laga qabto baahiyaha degdegga ah.

## 2.2. Arrimaha siyaasadeed oo ka soo horjeeda kuwa farsamo

Dhulka waa mid ka mid ah arrimaha siyaasadeed ee ugu nugul waddan kasta. Sidoo kale way adag tahay, dhinaca farsamo iyo sharci labaduba.

- Dhulka wuxuu ku xiran yahay **tageerada** siyaasadeed iyo danaha ay leeyihin aqoonyahannada. Inta badan dhulka waa arrin siyaasad ahaan kacsan, waana isha iskuhorimaadyada dhabta ah oo dhici kara.
- Sidookale dhulka waa **farsamo** aad u sarreysa: waxay u baahan tahay xirfadlayaal, oo la tacaalaayo nidaamyada sharciyeed oo xaalad taarikh, dhaqan iyo dhaqaale ahaan adag.

Waa muhiim in lala tacaalo dhinacyada siyaasad iyo farsamo. Dhowr waddan ayaa isku dayay inay hawsha gebi ahaan ay ka dhigaann siyaasad; waxay ku qasbanaadeen inay dib hawsha u bilaabaan oo ay dib u qaabeeyaan geedi socodka si ay u tixgeliyaan caqabadaha farsamo. Waddamada qaar ayaa isku daya in hawsha gebi ahaan ay ka dhigaan farsamo,waxay ku dadaaleen sidii ay u heli lahaayeen sharciyo cusub iyo qaabab la dhaqan geliyay oo shaqeynaayo.

Hagahaan ayaa qeexaya qaab lagu xallin karo dhibaatooyinkaan.

## 2.3. Jadwalka hannaanka siyaasadda

Dib-u-habeynta siyaasadaha dhulka iyo nidaamyada maamulka dhulka ayaa ka kooban arrimo badan. Waxay quseysa hay'ado badan oo dowladeed iyo daneeyayaal kale. Filo inay qaadan doonto waqti dheer, illaa iyo 10 sano. Taasi waxay u baahan tahay dadaal muddo dheer oo heer sare oo laga doonaayo dhinacyada dhamaan sida dowladda, bulshada rayidka iyo kooxaha milkiileyaasha dhulka, xirfadlayaasha dhulka iyo bangiyada.

Iyadoo leh aragti foog oo muddo dheer, waxaa fikrad fiican ah in la soo bandhigo istraatijiyado loogu talagalay muddo gaaban, muddo dhexdhexaad iyo muddo dheer. Hubso in miisaaniyadda ay ku filan tahay: ma aha inay daboosho oo keliya kharashaadka taxanaha aqoon isweydaarsiga ee lagu qeexay hagahaan, laakin sidookale dhamaan hawlaha la xiriira: daraasadaha, la tashiga, tababarka, iyo sidookale maareynta geedi socodka laftiisa.

## 2.4. Iskuxirka badeecada iyo hawlaha

Waa lagama maarmaan in lagu fikiro labada dhinac ee "badeecada" (siyaasadaha dib loo eegay, sharciga qabyada ah, nidaamyada macluumaadka dhulka iwm.) iyo "geedi socodyada" (sida loo helo heshiisyo si loo helo badeecadaan). Siyaasadda wanaagsan, ama xalka farsamada wanaagsan, waa mid aan waxtar leheen haddii daneeyayaasha kale duwan aysan oggolaanin – waxayna u eegtahay inaysan oggolaan doonin haddii aan laga qeyb galanin hawlaha qoraalka.

Maskaxda ku hay in sidookale 10-ka sanno ee loo baahan yahay in lagu dayactiro nidaamka dhulka waa waqti badan marka laga eego dhinaca siyaasadda. Siyaasiyiinta, iyo daneeyayaasha kale, ayaa u baahan inay codbixiyeyaashooda kala duwan iyo tageerayaashooda u muujiyaan inay hormar

sameynayaan. Tan micneheedu waa in hawsha ay dhaliso wax soo saar – qorshe siyaasadeed, qabyo qoraal sharci, iwm. – si isdaba joog ah. Taas beddelkeedu waxay micneheedu tahay waa in mowduuca loo kala qeybiyo qeybo la maareyn karo oo muddo macquul ah lagu la tacaali karo.

“Habraac” la isku raacay ee weji kasta oo ka mid ah geedi socodka siyaasadda dhulka ayaa loo baahnaan doonaa, iyo weliba misaamo kala duwan oo, qaran, gobol iyo maxalli. Waxaa jiri karo kala duwanaasho weyn oo gudaha dalka, gobol illaa iyo gobolka kale, ama u dhexeyso magaalo, beeraha iyo meelaha qalalan. Waxay noqon kartaa in xalka keliya uusan ku habbooneen meel walba. Dib-u-habeynta ayaa laga yaabaa inay ka bilaabato hal meel ka hor inta aan meelaha kale laga hirgelinin.

# Cutubka 3-aad. MAAREYNTA KHILAAFAADKA IYO SIYAASADDA

Cutubka 3-aad wuxuu muujineyaa istiraatijiyado suurtagal ah oo lagu xallinaayo khilaafaadka ka soo baxaayo ururrada iyo kooxaha aragtiyada kala duwan ka qabo arrimaha dhulka iyo isbarbar dhiga danaha siyaasadeed. Ujeeddada cutubka waa soo jeedinta waddada loo maraayo xallinta khilaafadka si dhamaan daneeyayaasha looga qayb geliyo geedi socodka iyadoo aan lagu xadgudbin daacadnimada nidaamka laftiisa.

## 3.1. Qaab deggan

- **Diyaari qayb isu duwid ah** si loo maareeyo loona qorsheeyo hannaanka siyaasadda dhulka. Qaybtaan waxay ku fiican tahay inay ku taalo hoggaanka wasaaradda qaran waana inay ka shaqeeyaan wakiilo dowladeed oo la aamini karo. Waa inay joogteyso xiriirka shabakadaha saamileyda badan leh iyo kooxaha khabirrada inta lagu gudajiro hawlaha oo dhan.
- **Soo uruuri macluumaadka asalka ah** ee ku saabsan nidaamyada dhulka iyo dhibaatooyinka jira. Macluumaadka waxaa loo uruurin karaa siyaabo kala duwan: qiimeynta ka-qaybgalka, wadahadallada lala yeelanaayo Hay'adaha Aan Dowliga Ahayn (NGOs) iyo ururrada bulshada, sahanno rasmi ah, dib u eegista maclumaad hosaadka, iyo dhageysiga dadweynaha. Falanqeynta wixi la soo helay, waxaana wanaagsan in la la wadaago dadka hirgelinaaya ama ay nidaamyada saameynayaan. Kaddib samee qoraallo fikradeed oo sharraxaaya dhibaatooyinka, adiga oo soo koobaayo jagooyinka kala duwan iyo isbeddellada loo baahan yahay, oo soo jeedi duluc qallafsan oo sida lagu dejin lahaa siyaasadaha cusub. Kuwaan waa in si joogta ah dib loogu eego maadaama ay dadka in muddo ah ka fikirayaan.
- **Qorshee aqoon isweydaarsi is daba joog ah.** Habka ka qaybqaadashada iyo wada tashiga ayaa muhiim u ah horumarinta siyaasadda dhulka, oo gaarsiisan ayna ka kooban yihin daneeyayaal fara badan. Aqoon isweydaarsiga ayaa awood u siinaaya dhamaan daneeyayaasha kala duwan inay ka wada hadlaan gacan na ka gaystan horumarka siyaasadaha qaranka iyo federaalka. Saamileyda waa inay awood u yeeshaan inay sheegaan mowqifyadooda, diiwaangeliyaan nidaamyada jira, caddeyaan dhibaatooyinka iyo xalalka suurtagalka ah, qorsheeyaan geedi socodka lagu dejinaayo siyaasadaha cusub, islamarkaana ay ka wada xaajoodaan faahfaahinnada. Hal aqoon isweydaarsi kuma filna: aqoon isweydaarsiyo isdabajoog ah, oo muddo dheer, ayaa loo baahnaan doonaa – laga yaabo heer federaal, qaran, gobol iyo maxalli. Muhiim maahan in marka ugu horreyso la helo qaab-dhismeedka saxda ah laakin waa in fikrad hore laga helo sida aqoon isweydaarsi kasta ugu gudbi doono hannaanka siyaasadda dhulka ee qaran. Wax ka beddel hannaanka haddii loo bahdo inta aad socotid.
- **Xaqiiji in dhamaan daneeyayaasha lagu matalo** aqoon isweydaarsiyada, gaar ahaan kuwa leh saameyn siyaasadeed oo ku filan in laga hortago guusha. Daneeyayaasha muhiimka ah waxaa ka mid ah dowladda (maxalli, gobol, qaran), xirfadlayaasha dhulka, bulshada rayidka, iyo cilmi baarayaasha. Ku casuun dad dheeri ah oo ku habboon mowduuca aqoon isweydaarsi kasta. Xaqiiji in aad casuunto dhamaan daneeyayaasha muhiimka ah – hana ka reebin bulshada rayidka adiga oo dadaal qaldan u maraayo in aad ka fogaato dood. Helitaanka iibsiga ka-qaybgalayaasha waa muhiim, sidaa darteed u sharrax hannaanka horay loo sii sadaaliyay goor hore, kuna dar fikradahooda.
- **Ka bilow siyaasadda.** Aqoon isweydaarsi(yada) ugu horreeyo waa inay helaan mowqif siyaasadeed una helaan iibsi iyo aaminadda hawsha. Inta ay tan dhaceyso waxaa adkaaneyso in ka-qaybgalayaasha ay diiradda saaraan arrimaha farsamada. Diiradda ha saarin arrimaha siyaasadda oo keliya, inkastoo; aqoon isweydaarsiyada hore waa in sidoo kale lagu soo darro arrimaha farsamada si loo dhiso awood. Arrimaha siyaasadda mar walbo dib ayaa loo booqon

karaa haddi loo bahdo. Tan waxay ku xirnaan kartaa doorashooyinka ama dhacdooyinka kale ee siyaasadeed ee waddanka ka dhaca. Had iyo jeer ka feejignow dareenka siyaasadeed una diyaar garow xallinta.

- **U gudub arrimaha farsamada.** Kaddib marka la helo iibsi siyaasadeed, u gudub ka wada hadalka mowduuca farsamadeed. Aqoon isweydaarsiga waa in uu ku dadaalo in uu aqoonsado kuna heshiiyo dhibaatooyin gaar ah, kaddib na la caddeeyo xalalka. Sii wad in aad dhamaan daneeyayaasha ka qaybgeliso aqoon isweydaarsiyada. Tan ayaa dadka ka qaybgelinayso.
- **Samee qorshe hawleed.** Mar haddii farsamada si habsami leh ay u bilaabmaan, qorshe hawleed qaabeysan ayaa la dejin karaa. Tan waa inay soo bandhigto xeer lagu gaaro qorshe wax soo saar – siyaasadaha qabyada ah ee loo bandhigi karo dadka go’annada sameeya. Waa in u wax ka qabto arrimaha siyaasadeed iyo kuwa farsamo labaduba. Miisaniyaddu waa inay noqoto mid macquul ah.

## 3.2. Samee qorshe hawleed waxqabadyo

Waxqabadyada qorshe hawleedka ka tirsan waxaa ka mid noqon karo:

- Aqoon isweydaarsiyo heer qaran, gobol iyo maxalli;
- Boqoshada daraasadeed iyo qiimeynta nidaamyada waddamada kale;
- Daraasadaha gaarka ah;
- Soo bandhigidda “dhaqamada wanaagsan”;
- La-tashiyada dadweynaha iyo wada hadalka warbaahinta guud;
- Hawlaha lagu dhisaayo isbaheysiyada siyaasadeed;
- Horumarin lagu sameynaayo cutubka la soo jeediyay;
- Sahamada macaamiisha iyo qiimeynta ka-qaybgalka;
- Qiimeynta hay’adeed iyo mid sharci.

Samee kooxo shaqeeya oo mowduucyo gaar ah leh. Way sahlan tahay in xal loo helo dhibaatooyinka koox yar marka loo eego aqoon isweydaarsi weyn. Dhibaatooyinka mowduucyo u habey oo u samee kooxo shaqo oo ka kooban daneyayaal kala duwan oo ka hawlgalo dhinacaas si ay wax uga qabtaan. Kooxaha shaqada ayaa sidookale waxtar u leh inay hubiyaan in doodda tahay mid waxtar leh oo daacad ah. Tusaale ahaan, haddii Hay’adaha Aan Dowliga Ahayn (NGOs) ay rabaan adeegyo dhuleed oo lacag la’aan ah, dadka farsamada ayaa u sharrixi karo sababta ay tan u suurtoobi Karin. Haddii ay dadka farsamada shegaan inay nidaam wanaagsan hayaan ayna u baahan yihiin kheyraad badan ayna ahayn dib-u-habeyn ballaaran, Hay’adaha Aan Dowliga Ahayn ayaa tusi karo sida uusan adeegga u shaqeyneyn.

## 3.3. Kooxaha shaqada oo mowduucyo leh

Kooxaha shaqada ayaa ah habka ugu wanaagsan oo diiradda lagu saari karo falanqaynta tafaasiisha adag in laga wadahadlo.

Tixgeli in aad yeelato kooxo shaqo oo ku saabsan mowduucyada soo socda:

- Arrimaha dib-u-habaynta hay’adeed;
- Nidaamyada iyo heerarka farsamo: sahminta iyo maareynta macluumaadka;
- Macluumaad, isgaarsin iyo baahin;
- Waxbarasho iyo awood dhisidda;
- Arrimaha sharciga, oo ay ka mid tahay gudbinta iyo nidaamyada diiwaangelinta dhulka.

Kooxaha shaqada ka dhig kuwa isku dhafan: ka-qaybgeli macaamiisha iyo siyaasiyiinta iyo sidookale khabirro farsamo. Xullo guddoomiyeyaal dhexdhexaad ah oo hagaayo doodda. Yeelo wakiil ka soo jeedo koox walbo oo shaqada oo ku soo war celiyo kulanka guud.

### 3.4. Tixgelinta jinsiga

Jinsiga waa mowduuc muhiim u ah arrimaha dhulka.

- Xaqiiji in siyaasadaha qabyo qoraalka ah ay si gaar ah uga hadleen danaha haweenka iyo ragga; hab isku dheelitiran, gaar ahaan arrimaha la xiriira dhaxalka;
- Ku dadaal isku dheelitir jinsiyadeed ee ka-qaybgalayaasha aqoon isweydaarsiga;
- Yeelo bandhigyo gaar ah oo ku saabsan jinsiga;
- Weydii dadka hadlaayo inay bandhigyadooda si gaar ah uga hadlaan jinsiga;
- In ragga iyo dumarka ay guddoomiyaan kooxaha shaqada;
- Xaqiiji in awood dhisidda iyo aqoon wareejinta ee maaddada loogu talagalay ragga iyo dumarkaba
- Aqoonso daldaloollada. Bilowga malaha qeexitaan guud oo ku saabsan sida nidaamka dhulalka dalka iyo sharciyada ay u shaqeeyaan. Haddii ay taasi dhacdo, amar ku bixi in la sameeyo daraasad (ama daraasado) koox mowduuca ku habboon, hana lagu soo bandhiggo aqoon isweydaarsiga xiga. Daraasadda waa inay aqoonsato daldaloollada, iskudhacyada iyo khilaafaadka siyaasadaha iyo nidaamyada kala duwan ee dhulka, oo ay ka mid yihin nidaamyada hay'adeed. Tan ogaanshaheedu ayaa horseedi doonta siyaasadaha kala duwan ee la waafajinaayo. Aqoonsiga iyo buuxinta daldaloolladaan ma aha waxqabad hal mar la qaban karo – tan waa in si joogta ah loo sameeyo inta lagu gudajiro geedi socodka horumarka siyaasadeed.

### 3.5. Ku dhisidda waxyaabaha jira

Waa muhiim in la fahmo waxa jira. Waxaa laga yaabaa in dhinacyo ka mid ah nidaamka jira wax laga beddelo si u si wanaagsan ugu shaqeeyo, ama loogu faa'iideeyo saboolka, iyadoo aan loo baahneen in wax laga beddelo wareegga, halka dib-u-habeyn weyn looga baahan yahay dhinacyada kale.

Daneeyayaasha waxay soo jeedin karaan fikrado ku aaddan habab wanaagsan ama waxay sheegi karaan nidaamyo "badan ama yar" shaqeynaayo oo la horumarin karo. Diiwaangeli talooyinkaan.

Waa suuragal in la amaaho oo la waafajiyo habab ka yimid waddamada ama gobollada kale. Tixgeli adeegsiga la-taliyeyaasha muddo gaaban si ay u soo bandhigaan habab lagu horumariyo dhamaan talooyinkaan.

- **La tacaal mowduucyo gaar ah.** Marka la aqoonsada daldalollada iyo isugeynta, shir isugu yeer khubarro si looga wadahadlo su'aalaha gaarka ah. Natiijooyinka dib ugu soo celi kooxda daneeyayaasha waa weyn. Tixgeli in aad muddo gaaban ka qaybgeliso la-taliyeyaal si wax looga qabto mowduucyo gaar ah.
- **Soo saar natiijo inta aad sii socotid.** Xusuusnow baahida loo qabo in la helo wax soo saar la taaban karo marxalad kasta oo geedi socodka ka mid ah. Daneeyayaasha kala duwan– gaar ahaan siyaasiyiinta – waxay u baahan yihin inay awood u yeeshaan inay taageerayaashooda tusaan inay horumar sameyn karaan, iyo in geedi socodka uusan ahayn hadal keliya.
- **Qabyo qoraalka siyaasadda.** Qor qoraalka ugu dambeeya ee siyaasadda oo ku saleysan wax soo saarka aqoon isweydaarsiga isdaba jooga. Tan waxaa lagu sameyn karaa marxalado, oo ay weheliso taxenayaal aqoon isweydaarsi ah oo dib loogu eego qabyada. Qabyo qoraalka ayaa u

baahnaan karo caawimaad laga helaayo khubarrada qaran ama/iyo kuwa caalamiga, iyo sidoo kale qorayaal khibrad leh, ka hor inta aan siyaasadda loo soo bandhigin baarlamaanka qaran.

## 3.6. Maareynta "siyaasadda" hannaanka

Bilowga geedi socodka horumarinta dhulka, siyaasaddu waa inay ka horeysa farsamadu. Mar haddii siyaasadda la soo bandhigo, dooddu waxay si xoog ah diiradda u saari kartaa arrimaha farsamada. Siyaasadda ugu dambeysa waa mid siyaasad ahaan iyo farsamo ahaan labaduba la aqbali karo.

Maadama u dhulku yahay mowduuc siyaasad ahaan kulul, waa lagama maarmaan in la helo talo weydiin siyaasadeed oo wanaagsan haddii la doonaayo in geedi socodka qorsheynta siyaasadda dhulka u noqdo mid lagu guuleysto. Tilmaamaha qaar:

- **Istraatiji ahaw.** Ogow cidda ay daneeyayaashu yihin, faham mowqifyadoodu, iskuna day in aad qaabeysid geedi socod tan tixgelinaayo. Ogaanshaha xaaladda siyaasadeed ayaa sidookale bixin doonto hagitaan ku aaddan jadwalka aqoon isweydaarsiyada iyo munaasabadaha, xulashada mowduucyada, qoondeynta kuraasta, iwm.
- **Xaqiiji in dowladda ay yeelato lahaansho.** Wasaaraddu ama dowlad goboleedka ay khuseyso waa inay si buuxda ula wareegan barnaamijka islamarkaana lagula xisaabtamo wax soo saarka. Tan way adkaan kartaa maadama ay wasaaraduhu rabi karaan inay ka fogaadaan khatarta siyaasadeed ee suurtagali karta ama aysan casuumin daneeyayaasha muhiimka ah.
- **Oggolow daal iyo iska cabin.** Dib-u-habeynta siyaasadda dhulka waa geedi socod muddo dheer qaadanaayo, sidaas darteed daalka waa wax la fahmi karo. Geedi socodka waxaa wehlin karo dano iyo khilaafaad. Ku dadaal in aad dhisto xulafooyin si geedi socodka iyo natiijooyinka loo joogteeyo. Ka fogow in aad ku tiirsanaato hal qof ama urur, xitaa haddii tan ay u muuqato habka ugu waxtarka badan oo wax kasta lagu socodsiin karo.
- **Dhis iibka.** Dhamaan daneeyayaasha muhiimka ah boos ka sii ajeendaha. Taasi waxay soo shac bixinaysaa arrimaha oo dhan iyadoo qof walbo la la socodsiinayso in si dhab ah loola dhaqmaayo.
- **Wargeli fududeeyaha iyo guddoomiyayaasha kulanka.** Si taxadar leh u xulo fududeeyayaasha aqoon isweydaarsiga iyo guddoomiyayaasha kulanka. Xaqiiji inay si buuxda u tageerayaan ajeendaha, ka war hayaan siyaasadda, ay hagi karaan wadahadalka, ayna fahansan yihiin natiijooyinka loo baahan yahay.
- **Qanci siyaasiyiinta muhiimka ah.** Way sameyn karaan ama jabin karaan hawsha, sidaa darteed hore u wargeli kala na xisaabtan natiijooyinka. Xaqiiji in Wasiirka u si buuxda u tageeraayo ajeendaha: siyaasiyiinta kale ayaa qaadan doonaa hoggaankiisa/keeda.
- **Xulo iskuduwaha saxda ah.** Waxaa lagama marmaan noqonayso in waqti badan lagu qaato diyaarinta siyaasadeed ee hawsha, gaar ahaan bilowga. Tani waxay u baahan tahay heer xirfado siyaasadeed, aqoonta ujeeddada, xirfadaha dhisidda xulafada, iyo in la heli karo Wasiirka iyo dadka kale ee saameynta leh. Raadi qof sifooyinkaan leh.
- **Waqti sii geedi socodka siyaasadeed.** Dowladdu waa inay la wareegta lahaanshaha geedi socodka, waana in daneeyayaasha muhiimka ah laga helo heshiis ku aaddan geedi socodka iyo wax soo saarka. Ma jiraan wax faa'iido oo laga heli karo u gudubka tafaasisha farsamo ka hor inta shuruudahaas la buuxinin. Ugu dambeyn, heshiiska siyaasadeed waa lama huraan haddii siyaasaddu la dhaqan geliyo marki la dhameystiro.
- **Ogolow in xoogga la kobciyo.** Isla mar ahaantaana, ha sugin in qof walbo u ogalaado ka hor inta shaqada la bilaabin. Tusaale ahaan, maamullada maxalliga ah waxaa laga yaabaa inaysan diyaar u ahayn inay beddelaan nidaamyadooda si ay ula jaanqaadaan heerarka qaran ee cusub. Dhowr ka mid ah ku soo dar guddiga marka hore; kuwa kalena way ka daba imaan doonaan marka ay arkaan faa'iidooyinka nidaamka cusub.

- **Dhis is afgarad.** Ku dadaal in aad dhisto is afgarad filan oo ka socda dhinaca daneyayaasha waa weyn si loo hubiyo in siyaasadda qabyada ay leedahay fursad wanaagsan oo lagu ansixiyo marka loo soo bandhigo golaha sharci dejinta.
- **Deeq-bixiyeyaasha ku hay meel daahsoon.** Tageerada laga helo deeq-bixiyeyaasha ayaa muhiim u noqon kara hawlaha dib-u-habeynta, laakin waa inay meel daahsoon ku koobnadaan. Waa inay aad u dabacsanaadaan si ay ula jaanqaadaan barnaamij muddo dheer oo lahaanshaha iyo halistu ay ku jirto gacmaha dowladda.

# Cutubka 4-aad. WAX KA QABASHADA ARRIMAHA FARSAMADA IYO IN DADKA LAGU WARGELIYO INAY KU LUG YEESHAAN

Cutubka afaraad wuxuu aqoonsanaaya arrimaha farsamada ee ugu waa wayn ee lala kulmi karo inta lagu gudajiro horumarinta iyo hirgelinta siyaasadda dhulka oo loo dhan yahay wuxuu na muujinayaa muhiimadda ay leedahay in mar walba la wargeliyo lagana qaybgeliyo daneyayaasha. Ujeeddooyinka cutubkaan waa: soo jeedinta hab lagu buuxiyo daldaloollada awoodda iyo in la aqoonsado habka farsamo ee ugu wanaagsan; caqli gal u ah muhiimadda ay leedahay in dadka la wargeliyo oo laga qaybgaliyo.

## 4.1. Si wax looga qabto arrimaha farsamada

Waxaa jiro dano badan oo ay leeyihin khubarrada farsamada ee ku lug leh arrimaha dhulka: waaxda dadweynaha iyo tan gaarka ah, heerarka kala duwan ee dowladda iyo hay'ado badan mid walbana leh taarikh, aragtiyo iyo nidaamyo u gaar ah. Waxaa suurtagali kara inay jiraan daldaloollo, waajibaad isku imanaayo iyo hawlo soo noq noqonaayo. Sidaa darteed, waxaa muhiim ah in daneeyayaasha farsamo iyo kuwa hay'adeed ee saxda ay ku lug yeeshaan hawsha dib-u-habeynta, si loo helo kalsooni, waa in la xaqiijiyo in naqshadaha ay yihiin kuwa macquul ah.

Koox walba way yeelan karto fikrado u gaar ah oo ku aaddan horumarka. Bandhigyada aqoon isweydaarsiga ee ku saabsan arrimaha farsamo, iyo wadahadallada kooxaha shaqada, ayaa laga yaabaa in aysan bilawga soo saari doonin horumar qaabeysan. Taas beddelkeedu, natiijada ayaa noqon karta rabitaan aan si wanaagsan u dhisneen oo is khilaafsan. Waa muhiim in sidookale la raadiyo kala duwanaan kooxda khubarrada farsamada, aragtiyo kala duwan, fikrado iyo taarikh waa in lagu soo daro.

Dadka farsamada ayaa inta badan kalsooni badan ku qaba nidaamyadooda, waxayna soo jeediyaan qaabab casriyeysan oo leh farsamo sare oo lagu ballaariyo. Waxay ka hortagaan isbeddelka, gaar ahaan haddii uusan u dhigmin aragtidooda farsamo. Laakin aragtidaan ayaa inta badan macquul ahayn – way kharash badan tahay ama waxay u baahan tahay dad badan oo xirfad leh inay socodsiiyaan. Sidee tan looga hortagi karaa?

- Dadka banaanka jooga ha qiimeyaan nidaamka islamarkaana isu keen dadka farsamada si ay uga heshiiyaan natiijooyinka.
- U oggolow in dadka isticmaala nidaamka ay faallo ka bixiyaan. Waxay farta ku fiiqi karaan dhibaatooyin ay ka mid yihiin caymis la'aan, helitaanka saboolka iyo haweenka iyo wax la mid ah. Xaqiiji in dadka u xil saran nidaamka ay oggolaadaan fallooyinkaan.
- Qiyaas kharashka iyo khayraadka aadanaha ee looga baahan yahay aragtida farsamada sare. Ma yihin kuwo macquul ah?

Way adag tahay in hore loo socdo illaa iyo dadka mas'uulka ka ah nidaamka jira ay oggolaadaan in nidaamka hadda jira uusan wanaagsaneen, in aysan suurtagal ahayn in lagu dhaqmo habka farsamo oo sare ee riyadooda, iyo in nidaamka uu daboolo dadweynaha intooda badan oo ay ka mid yihiin kuwa saboolka iyo haweenka.

Marka kuwa mas'uulka ah ay aqbalaan qodobadaan, waxay u badan tahay inay aqbalaan /ama dejiyaan beddel kale oo macquul ah loona dhan yahay. Marxaladaan marka la maraayo, haddii geedi socodka siyaasadeed u jiro, waxaa suurtagal noqon doonta in dib looga fikiro nidaamyada farsamo iyo kuwa sharci. Tan waxaa ku jiri kara:

- La-talin farsamo si ay gacan uga geysato dib u fikirka.

- Aqoon isweydaarsiyo lagu soo bandhigaayo isbedellada la soo jeediyay, helitaanka iibka daneyayaasha iyo in macaamiisha loo oggolaado inay qiimeeyaan nidaamka cusub ee la soo jeediyay.
- Kooxo farsamo oo kala duwan oo midba midka kale nidaamkiisa qiimeynaayo.
- Xoojinta hay’adda.
- Wadahadallada u dhexeeyo hay’adaha kala duwan oo ku saabsan wajibaadka shaqo, ilaalinta xogta keydka macluumaadka, kheyraadka aadanaha iyo maalgelinta.

La-taliyeyaasha qaran iyo kuwa shiisheeya waxay meel kale ka keeni karaan khibrado qiimo leh. Laakin si taxaddar leh u isticmaal adeegyadooda si aad caro uga fogaato. Shaqaaleysii la-taliyeyaal si ay si daahsoon ugu bixiyaan adeegyadooda halka la siin lahaa door muhiim ah.

## 4.2. Muhiimadda ay leedahay in dadka la wargeliyo oo laga qaybgeliyo

Waa muhiim in la fahmo fikradaha iyo baahiyaha dadka iyo ururrada hirgeliyo, isticmaalo, ayna saameeyso, nidaamyada dhulka ee dib u eegista lagu sameynaayo. Waa in la siiyo fursad ay wax ugu biiriyaan siyaasadda cusub. Tan micnaheedu ma’aha in keliya lala hadlo xirfadlayaasha iyo saraakisha sare ee dowladda, balse sidookale dadka maxalliga, beeralayda, kooxaha bulshada, iyo shaqaalaha heerka-hoose oo hirgeliya nidaamyada islamarkaana fahansan dhibaatooyinka maalinlaha.

Maadama ay arrimaha dhulka adag yihiin oo qawaaniinta iyo nidaamyada ay inta badan qarsoon yihiin, waxaa dhici karto in lagama marmaan ay tahay in dadka lagu wacyi geliyo sida uu nidaamka hadda u shaqeeyo ka hor inta ay wax muhiim ah ku soo kordhinin doodda. Geedi socodka horumarinta siyaasadda waa in u wehliya olole wacyigelin si daneyayaasha iyo dadweynaha looga wargeliyo, loogana qaybgeliyo, hawlaha hadda socda. Xaqiiji in waqti iyo kheyraad ku filan loo qoondeeyo dadaalkaan.

Olole kale oo wacyigelin ayaa loo bahnaan doonaa kaddib marka isbedellada la hirgeliyo. Tan waxay lagama marmaan u tahay in la xaqiijiyo in dhamaan dadka ay khuseyso ay fahmaan sababaha nidaamyada cusub iyo sidookale sida loo raaco.

Olalaha nocaas wuxuu sidookale muhiim u yahay in dowladda ay maareyso khatarta maadama ay shacabka ku wargelin karaan arrimaha cusub ee laga wada hadlay iyo in daneyayaasha ay ka-qaybgalaan wadahadalka si loo dhiso aaminaad iyo kalsooni.

# Cutubka 5-aad. TAAGEERIDDA OGGOLAANSHAHA IYO HIRGELINTA

Cutubka shanaad wuxuu iftiiminaaya tillaabooyinka aasaasiga ah ee lagu ansixinaayo laguna hirgelinaayo siyaasadda qabyo qoraalka. Ujeedadda cutubkaan waa in la bixiyo hagitaan ku saabsan ansixinta iyo hirgelinta siyaasadda.

## 5.1. Tillaabooyinka loo maro ansixinta iyo hirgelinta siyaasadda

- **Siyaasadda ansixi.** Waxaa lagama maarmaan noqon doonta in la ilaaliyo siyaasadda cusub iyadoo loo maraayo hannaanka ansixinta ee wasaaradda ay khuseyso, iyo barlamaanka qaran. Tani waxay u baahan doontaa halyey (ama halyeyo) – shakhsi saameyn leh, koox isbeddel, ama isbaheysi daneed. Halyeyada ayaa laga yaabaa inay ku lug lahaayeen hannaanka, waxay ku qanacsan yihiin faa'iidooyinka, oo waxay diyaar u yihiin inay xoog ku bixiyaan in la ansixiyo isbeddellada.
- **Abaabul kheyraadka.** Bilaabidda dib-u-habeynta iyo joogtaynta horumarka waxaa ku baxaaya kharash. Waxay qaadataa maareyn xirfadeed iyo waqti shaqaale oo yar. Tani maahan su'aal la xiriirta misaaniyadda iyo barnaamijka socodka shaqada. Waxay kalo ka dhigan tahay xaqiijinta in dadka ay helayaan dhiirigelin ku filan ayna ka go'an tahay dib-u-habeynta.
- **Abuur qaab-dhismeed si loo hirgeliyo.** Marka la ansixiyo siyaasadda dhulka, waa in loo beddelaa qaab-dhismeed la hirgelinaayo. Taasi micneheedu waa in hay'adaha kala duwan loo qeybiyo ujeeddooyin iyo howlo cusub, oo ay ka kooban yihiin la-hawlgalayaal cusub, soo bandhigidda habraacyo cusub, bedelidda qaab-dhismeedka ururrada jira, iyo laga yaabo in la abuuro ururro cusub. Waxaa lagama maarmaan noqon doonta in la diyaariyo qorshooyin waxqabad la taaban karo iyo in la dejiyo howlaha la fullin karo iyo heerarka. Waxaa fiicnaan laheyd in si tartiib tartiib ah loo soo bandhigo dib-u-habeynta, waxaa dhici karto in aad ku tijaabiso gobol tijaabo ah ka hor inta aadan waddanka oo dhan laga isticmaalin.
- **Awood dhis.** Qaababka cusub micneheedu waa horumarinta kheyraadka aadanaha. Waxaa lagama marmaan noqon doonta in la shaqaaleysiiyo shaqaale leh xirfado kala duwan iyadoo dib loo tababaraayo shaqaalaha hore u joogay si ay ula jaanqaadaan qaababka cusub.
- **Hirgelinta iyo kormeerka horumarka.** Mar haddii siyaasadda cusub la meel mariyo, waxay u baahnaan doontaa in la hagaajiyo si loogu shaqeeyo si habsami leh. Hay'adaha gaarka ah waa inay la socdaan wax qabadkooda, laakin habab cusub ayaa loo baahnaan doonaa in la helo si loola socdo horumarka guud haddii in ka badan hal hay'ad ay ku lug leedahay. Ururrada aan dowliga ahayn waxay si gaar waxtar ugu yeelan karaan bixinta kormeer madaxbannaan oo dib-u-habeyn ah.

# Cutubka 6-aad. GEEDI SOCODKA SIYAASADDA DHULKA

Cutubka lixaad wuxuu iftiiminayaa doorka muhiimka ah ee casharka dhulka ee horumarinta siyaasadaha dhulka oo tilmaamaya toban qodob oo muhiim u geedi socodka siyaasadda dhulka. Ujeeddada cutubka waa in la bixiyo guudmar guud oo ku saabsan geedi socodka siyaasadda dhulka.

## 6.1. Doorka muhiimka ah ee casharka dhulka

Guuldarrada siyaasadaha dhulka ee waddamo badan ayaa ah in aysan lahayn “aaladaha dhulka” oo muhiim ah: habraacyo ama qaabab wax looga qabto qeybaha gaarka ah ee nidaamka dhulka. Tusaale ahaan, waxaa jiri karo baahi:

- Qaab-dhismeed sharci oo ka hadlaayo ka mid ahaanshaha waaxda gaarka ah ee maamulka dhulka.
- Diiwaangelin dhuleed oo xoog leh islamarkaana loo wada dhan yahay.
- Nidaam maareynta macluumaadka dhulka oo loo wada dhan yahay.
- Barnaamij awood kobcin oo waara.
- Nidaam dib u soo kabasho dhaqaale oo la awoodi karo oo ku saabsan maamulka dhulka.
- Bixinta ikhiyaar ku aaddan xuquuqda kooxeed ee muddada degnaanshaha dhulka, gaar ahaan kooxaha qabaa’ilka, bulshooyinka reer miyiga ah, bulshooyinka soo barakacay, iwm.
- Aalado loo wada dhan yahay oo loogu talagalay helitanka dhulka, la wareegidda iyo magdhowga meelaha magaalooyinka iyo miyiga. Waa inay waafaqaan sharciga dhaqanka ee dhulka, tixgeliyaan habnololeedyada iyo kheyraadka dabiiciga ah, ayna shaqeeyaan haddii diiwannada dhulka aysan jirin.
- Casharka dhulka ee ku habboon xaaladaha maxalliga ee kala duwan ee dalka ka jira.

UN-HABITAT waxay aasaastay shabbakad, Shabbakada Caalamiga ah ee Qalabka Dhulka (www.gltn.net), si ay u uruuriso tusaalayaasha aaladaha noocaan iyo horumarinta aalado cusub si loo buuxiyo daldaloollada muhiimka ah. Waa suurtagal in la qaato aaladahaan si loogu waafajiyo xaaladaha dalka ka jira.

## 6.2. Toban qodob oo muhiim u ah geedi socodka siyaasadda dhulka

1. **Hogaaminta Dowladda iyo Qaranka waa muhiim.** Dadka dibedda jooga ma noqon karaan dadka keliya ee u ololeeya isbeddelka. Diyaargarowga siyaasadeed ee hoggaamiyeyaasha qaranka waa muhiim. Hasa ahaatee, waxaa jirta baahi cad oo loo qabo in la aqoonsado halyeeyada heerarka kala duwan, oo ay ka mid yihiin xirfadlayaasha, qeybaha hoose, aqoonyahanno iyo warbaahinta. Hoggaanka qaranka iyo dhisidda awoodda ee heerarka oo dhan waa in mar walba mudnaan la siiyo.
2. **Dib u heshiisiinta daneyayaal iyo himilooyin badan.** Hawlaha dib-u-habeynta marna si habsami leh uma shaqeeyaan. Marka la eego kala duwanaanshaha aragtiyada, waajibaadka inta badan isku xiran ee ka dhexeeya wasaaradaha dhexdooda, tartanka hay’adaha iyo danaha la maalgeliyay ee dhamaan dadka ay khuseyso ayaa mar walba dhalin doono khilaaf. Kala duwanaanshahaan waa in waqti hore la soo bixiya oo si joogta ah wax looga qabto.
3. **Waxay u baahan yihiin aragti fog.** Arrimaha dhulka aad ayay u dhib badan yihiin kumana amaahan karaan qaab mashruuc oo labo sano ah. Ka digtoonow in aad ku degdegto hirgelinta xalal muddo dheer; xalalka jira ayaa laga yaaba inaysan shaqeynin, mudnaanta ayaa isbeddeli karta. Dhisidda degmada ma ahan hawl hal mar ah laakin waa inay sii socoto muddada ay hirgelinta dib-u-habeynta socoto.

4. **Ka soo bax geedi socodka iyo badeecada labaduba.** Qaabka dib-u-habeynta loo gaaro ayaa la mid ah siyaasadda iyo natiijooyinka looga soo baxo muhiim u noqon karto. Tageerada dadka u ololeeya siyaasadda iyo dhisidda degmooyin dib-u-habeyn waa muhiim. Siyaasiyiintu waa xubno muhiim ah balse waxay xilka hayaan muddo 3/5-sano ah. Sidaas darteed, hawsha waa inay si joogta ah guul u keenta, waxaa laga yaabaa ka faa'iidaysiga fursadaha markii ay soo baxaan halkii ay ku xaddidnaan lahaayeen jadwal hore loo go'aamiyay ee hawlaha la sameyn karo.
5. **Maareynta khatarta siyaasadeed waa mid muhiim ah.** Siyaasadda waxay qayb ka mid ah geedi socodka mana laga fogaan karo. Dib-u-habeynta waxay u baahnaan kartaa istraatijiyo, qaab-dhismeedyo, iyo farsamooyin yareyn kara ama tirtiri kara awoodda jilayaasha awoodda leh. In xisbiyo laga dhex dhiso kooxaha daneyayaasha waa muhiim.
6. **Xalalka farsamo oo jira intooda badan maahan kuwa ku filan.** Farqi wayn ayaa u dhexeeya siyaasadda iyo hirgelinta. In badan oo ka mid ah aaladaha jira ayaa ah kuwa aan habbooneyn: waa qaali, adag yihiin sharcina way ku dhisan yihiin, mana awoodi karaan inay (tusaale ahaan) xuquuqda kooxaha ama qaababka casriga ee muddada degnaanshaha dhulka. Xalalka farsamo ee habboon waa inay noqdaan kuwa ay dowladda iyo macaamiisha labaduba awoodi karaan.
7. **Iskudar khibradaha farsamo iyo kuwa aasaasiga ah.** Sharci dejinta inta badan waxaa xukuma aqoonyahannada tiknoolojiyadda. Xaqiiqada aasaasiga ah iyo xalalka aasaasiga ah ayaa sidookale loo baahan yahay in la fahmo oo lagu daro geedi socodka dib-u-habeynta. Taasi micneheedu ayaa ah isticmaalka geedi socodka ka-qaybgalka iyo xaqiijinta in hawsha aysan markale qabsanin aqoonyahannada tiknoolojiyada ama kuwa ka sii fiican.
8. **Taageerada geedi socodka waxay u baahan tahay kheyraad loo qoondeeyay.** Xalalka farrsamo ayaa inta badan soo jiita danaha deeq-bixiyeyaasha iyo dowladda, laakin taageridda geedi socodka ka-qaybgalka lama qiimeeyo inta badan sidaas darteed na dhaqaale ku filan lama siiyo. Hannaan daciif ah wuxuu xalka farsamo ee xiisaha badan ka dhigi karaa mid aan muhiim ahayn – sida ay muujiyeen mashruucyo dib-u-habeyn oo badan oo fashilmay ama istaagay.
9. **Istiraatijiyad wacyigelineed oo wax ku ool ah ayaa muhiim ah.** Cadaadis ka saaran in hawsha laga soo baxo, dib-u-habeyayaasha ayaa inta badan dayaca istiraatijiyada isgaarsiinta. Hasa yeeshee olole wacyigelin oo gooni ah la'aantiis, macaamiisha ayaa qaadan doonin isbeddellada la soo jeediyay.
10. **Filo hubaal la'aan siyaasadeed.** Maadaama u dhulku u baahan yahay aragtiyo fog oo waqti dheer ee xagga bixinta, wuxuu had iyo jeer noqdaa aaladda siyaasiyiinta (qaran iyo dowladda hoose) iyo bulshada rayidka iyo deeq-bixiyeyaasha, oo marka u qof waliba oggolaado, cadaadiska siyaasadeed ayaa soo kordhiyo qaabab cusub. Mararka qaar waa muhiim in la sii wado shaqada farsamada ee habboon oo sidaas loo sameeyo isbeddel siyaasadeed.

# LIFAAQYADA

## Lifaaqa 1-aad. Foomka magacaabidda ka qaybgalaha

# ASTAAN(Astaamaha) abaabulayaasha/kafaala qaadayaasha tababarka

**FOOMKA MAGAABIDDA KA QAYBGALAHA**

**< Sida loo sameeyo siyaasad dhul loo dhan yahay >**

Taariikhda, goobta (magaalo ama waddan)

**Magaca ururka magacaabaayo:** ……………………………………………………………………………………………………..........

**Macluumaadka ka qaybgalaha la magaacabay**

Magaca iyo magaca qoyska:

…………………………………………………………………………………………………………………........................

Jagada/doorka hay'adda: ………………………………………………………………..……………………………………………………

Jinsiga:

…………………………………………………………………………………………..………………………………………………………….

Dhalasho: ……………………………………………………………………………………………………………….……………………………

Waddanka aad hadda dagan tahay:

…………………………………………………………………………………………………………….………….

Taleefanka:

……………………………………………………………………………………………………………………………………………….

**Macluumaadka qofka soo magacaabay**

Magaca iyo magaca qoyska:

…………………………………………………………………………………………………………………........................

Jagada/doorka hay'adda: ………………………………………………………………..……………………………………………………

Taleefanka:

……………………………………………………………………………………………………………………………………………….

Si kooban u sharrax sida u ka-qaybgalaha ugu firfircoon yahay shaqada socota ee arrimaha dhulka

……………………………………………………………………………...……………………………………………………………………

……………………………………………………………………………...……………………………………………………………………

Si kooban u sharrax sida ka-qaybgalka ama khibradda ka-qaybgalaha ee ku aaddan horumarinta siyaasadda dhulka

……………………………………………………………………………………………………………………………………………………

……………………………...…………………………………………………..………………………………..……………………………………

Si kooban u sharrax fikirkaaga ku aaddan qabka qofka la soo magaacabay uu uga faa'iideysan doono munaasabaddaan

……………………………………………………………………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………………………………………………………………

Si kooban u sharrax xiriirka hay'adeed iyo xirfadeed ee ka qaybgalaha oo ku saabsan waaxda dhulka

……………………………………………………………………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………………………………………………………………

Taarikhda: _______________ Saxiixa magacaabaha: ___________________________________________

***Waad ku mahadsantahay dhameystirka magaacibidaan. Fadlan ku soo celi [taariikhda] [magaca qofka] ee [emaylka]***

Lifaaqa 2-aad. Qiimeynta tababarka ka hor

# ASTAANTA(Astaamaha) abaabulayaasha/kafaala qaadayaasha tababarka

**QIIMEYNTA TABABARKA KA HOR**

**< Sida loo sameeyo siyaasad dhul loo dhan yahay >**

Taariikhda, goobta (magaalo ama waddan)

## Macluumaadka gaarka ah

Magaca:

Jagada / Cinwaanka:

Ururka / Waaxda:

Sanadaha waayo aragnimada shaqo:

Sanadaha waayo aragnimada shaqo ee ku saabsan arrimaha dhulka ama /iyo jinsiga:

Heerka aqoonsi waxbarasho ee la gaaray:

## Maclumaadka shaqada

Waa maxay mowduuca ama waaxda shaqada aad hadda sameyso?

………………………………………………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………………………………………………

Shaqadaada maalinlaha ma kula kulantaa arrimaha dhulka? Fadlan si kooban u sharrax.

………………………………………………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………………………………………………

Maamulahaaga tageero aad tababarkaan ku joogto ma ka heysataa?

………………………………………………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………………………………………………

Shaqadaada, miyaad ku sameysaan cilmi baaris iyo qiimeyn? Fadlan si kooban u sharrax.

………………………………………………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………………………………………………

Waa maxay caqabadaha ama dhibaatooyinka waa wayn ee aad kala kulanto shaqadaada? Fadlan si kooban u sharrax.

………………………………………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………………………………………

Waa maxay guulaha waa wayn aad illaa iyo hadda shaqadaada ka gaartay? Fadlan si kooban u sharrax.

……………………………………………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………………………………………

Fikirkaaga ka bixi aqoonta, xirfadaha iyo khibradda aad hadda heysato kadib na qiimeyn isku samey.

**1= si aad u diiddan    2= diiddan    3= in yar oggol    4= oggol    5= si aad u oggol**

1. Khibrad ku leh horumarinta siyaasadda dhulka

   **1    2    3    4    5**

2. Fahansan baahida loo qabo siyaasadda dhulka oo loo dhan yahay

   **1    2    3    4    5**

3. Fahansan sida siyaasadaha dhulka ay u takooraan dadka saboolka

   **1    2    3    4    5**

4. Xirfado iyo waayo aragnimo ku saabsan maareynta khilaafaadka la xiriira dhulka

   **1    2    3    4    5**

5. Khibrad u leh la tacaalidda arrimaha farsamo

   **1    2    3    4    5**

6. Aqoon u leh shaqada GLTN

   **1    2    3    4    5**

Maxaad rajeynaysaa in aad ka barato tababarkaan aqoon isweydaarsiga? Fadlan si kooban u sharrax.

……………………………………………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………………………………………

Sidee tan ugu adeegsan laheyd shaqadaada mustaqbalka? Fadlan si kooban u sharrax.

……………………………………………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………………………………………

## Lifaaqa 3-aad. Qaabka khibradda

# Tusaalaha aragtida xirfadlaha /qaabka khibradda

Qaabkaa waxaa loo adeegsan karaa in lagu furo dhowr su'aalood, ama bilow gaaban oo dajinaaya jawi xiisad marka ka-qaybgalayaasha la is baraayo. Layliga wuxuu inta badan qaata 30-40 daqiiqo, oo ay ku xiran tahay tirada ka-qaybgalayaasha.

1. Fududeeyuhu wuxuu u baahnaan doonaa sabuurad ama warqado, iyo sidookale qalimaan, si uu u diyaariyo foomka.
2. Inta waxaa u dheer, ka-qaybgale kasta waxaa la siin doonaa qoraalo dhejis ah.
3. Qaybaha foomka waa in si wadajir ah looga la heshiiyo ka-qaybgalayaasha, laakin fududeeyaha ayaa hore u sii diyaarin kara hage si hawsha loo bilaabo.
4. Ka-qaybgale kasta ayaa kadib laga codsanaayaa in u qaato dhowr daqiiqo si uu uga fikiro halka uu ku habboon yahay, marka loo eego khibradooda.
5. Ka-qaybgalayaasha ayaa kadib lagu casuumaaya inay yimaadaan sabuuradda ama waraaqaha, inay dadka is baraan iyagoo isticmaalaayo dhowr erey, oo qoraalka dhejiska ah ay ku dhejiyaan meesha loogu talagalay ee foomka.
6. Waxaa jiri kara ka-qaybgalayaal dareemaaya inaysan ku habboonayn qayb walba (ama iska caabin ku ah in 'lagu xiro'' ama fikradaha qaldan oo hal nooc. Sidaas darteed, fududeeyuhu wuu ku soo dhoweyn karaa inay warqadooda ku dhejiyaan meel kasta ee sabuuradda oo leh sharraxaad kasta oo ay naftooda ka jecel yihiin.
7. Qabanqaabiyayaashu ayaa laga yaaba inay doonayaan in foomka ay saaraan mid ka mid ah derbiyada qolka tababarka, si loo tixraaco, haddii loo baahdo, inta lagu gudajiro koorsada. Sidookale waa la qori karaa waxaana lagu soo dari karaa warbixinta ugu dambeysa ee koorsada iyadoo ay la socoto taarikh nolooleedyada ka-qaybgalayaasha koorsada.

| | Qeybta guud ee shaqada | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| | Sharciga iyo xuquuqda aadanaha | Maamulka dhulka | Jinsiga | Dhaqaalaha | Waxkale |
| Tacliinta iyo Cilmi Baarista | | | | | |
| Hay'adaha Aan Dowliga Ahayn (NGO) iyo bulshada | | | | | |
| Waaxda gaarka loo leeyahay | | | | | |
| Ururrada caalamiga | | | | | |
| Dowladda | | | | | |
| Waxkale | | | | | |

## Lifaaqa 4-aad. Shaqo kooxeed: Maareynta khilaafaadka ka dhalan karo “siyaasadda” hannaanka

# Tilmaamaha

Abuur kooxo 5-8 qof ka tirsan

Layliga wuxuu inta badan qaataa 60 daqiiqo, oo ay ku xiran tahay tirada ka-qaybgalayaasha. 30 daqiiqo oo wadahadal ah iyo 30 daqiiqo oo dib looga soo warbixinaayo.

Bixi tusaalooyin la taaban karoo o ku aaddan xiliga aad qayb ka ahayd geedi socodka horumarinta siyaasadda dhulka (ama habab la mid ah) oo ay ahayd in aad la tacaasho khilaafadyada iyo siyaasadda.

1. Maxay ahaayeen arrimaha muhiimka ah?
2. Sideed wax uga qabatay?
3. Maxaa kale ee aad sameyn laheyd?

## Lifaaqa 5-aad. Shaqo kooxeed: Door-ciyaar

# Tilmaamaha

**Qeybta 1-aad: Diyaargarow**

Mid kasta oo idiin ka mid ah waxaa loo xilsaaray door.

Baro doorkaaga:

4. Waa maxay baahiyahaaga?
5. Sidee u helaysaa dhul?
6. Yaa maamula dhulkaaga?
7. Waa kuwe danaha aad ka leedahay siyaasadda dhulka? Sidee baahiyaga uga jawaabcelin doonaan?

**Qaybta 2-aad: Shaqo kooxeed**

Kooxdaada dhexdeeda, qaab iskaashi ah u sameeya siyaasad dhuleed.

Tallaabada 1-aad: Koox ahaan, ka wada hadla oo ku heshiiya 3 mudnaan oo ugu muhiimsan ee loo baahan yahay in siyaasadda dhulka ay wax ka qabato.

Tallaabada 2-aad: Samee sharraxaad gaaban (ugu badnaan 2 illaa iyo 3 sadar) oo sharraxaaya waxa ay siyaasaddu ka sheegi doonto mid kasta oo ka mid arrimaha mudnaanta leh.

Tallaabada 3-aad: Muuji hay'adaha doorka muhiimka ah ku leh hirgelinta waxyaabaha siyaasadda ay bixineyso.

Tallaabada 4-aad: Ku soo noqo kulanka, soo bandhig sharraxaad kooban ee 3 arrimood ee mudnaanta leh iyo doorka hay'adaha ku hawlan hirgelinta siyaasadda.

Tallaabada 5-aad: ka fikir hawsha oo natiijooyinka kala wadahadal kooxaha kale. Maxaa la hagaajin karaa?

## Doorarka

**DOORKA 1-AAD: DUQA MAGAALADA**

Waxaan duqa magaalada ahaa labo sano. Magaaladeyda, waxaa ka jira horumar dhaqaale oo togan, laakin shaqo la'aanta dhallinyarada waa mid aad u sareysa oo maalgashiga raasulmaalka ganacsiyada, guryaha, hoteelada iyo xafiisyadu uma fiicna sida laga rabay. Ma haysto miisaaniyad igu filan oo aan ku maalgeliyo adeegyada iyo kaabayaasha dhaqaalaha, taasi oo aniga igu adkeynaysa in aan hubiyo uruurinta qashinka iyo bixinta adeegyada biyaha iyo nadaafadda. Xaafadaha qaar ayaa si wanaagsan ku nool, balse qaar kale ayaa aad u liita oo dhibaateysan, gaar ahaan maadama dadku aysan haysanin guryo ku habboon. Intaa waxaa dheer, waxaa jiro muranno badan oo la xiriira dhulka iyo guri ka saarista khasabka oo horseedda dhacdooyin amni. Wax walbo hal mar wax kama qaban karo, laakin muddada aan xilka haayo, waxaan rabaa in aan ugu yaraan xalliyo labo dhibaato oo waaweyn. Geedi socodka siyaasadda dhulka ee hadda la bilaabay waa fursad muhiim ii ah in aan sameeyo isbeddeladaan.

**DOORKA 2-AAD: WASIIRKA DHULKA, GURYAHA IYO SHAQADA DADWEYNAHA**

Waxaa hadda la ii doortay Wasiirka Cusub ee Dhulka, Guryaha iyo Shaqada Dadweynaha ee dowladda federaalka ee Soomaaliya. Kaddib shaqooyin badan oo dowladeed iyo ganacsiyo gudaha Soomaaliya iyo dibedda, tan waxay ii tahay fursad muhiim ah oo aan ku horumariyo waxyaabo badan ee ka jira Gobolka Soomaaliya. Waxaan xogaa aqoon u leeyahay dhulka, guryaha iyo shaqada dadweynaha waxaana rabaa in aan hirgeliyo siyaasad cusub ee ku saabsan dhulka oo xallin doonto in badan oo dhibaatooyinka hadda aan wajaheyno. Maalgashato badan ayaa ii la imaado fikrado xiiso leh oo ku aaddan horumarinta mashaaricda aasaasiga ah ee kaabayaasha dhaqaalaha. Ragga ganacsatada ayaa sheegay inay diyaar u yihiin inay maalgashadaan hoteelada iyo xafiisyada waxaana rabaa in aan xaqiijiyo in dhul loo diyaariyo mashaaricda noocaas. Waa in aan sidookale xaqiijiyo in fullinta ay si dhakhso ah ku dhacdo si dhaqaalaha lagu fullinaayo hawlaha muhiimka ay u soo gasho akoonka Wasaaradda. Waxaa sidookale jira codsiyo ka imaanaayo Gobollada, oo mid kasta u raacaayo sharciyo iyo geedi socod isku mid ah balse aan isu ekeen. Waxaan u baahanahay nidaam si sahlan loo maareyn karo oo qof walbana u fahmi karo. Geedi socodka siyaasadda dhulka ee hadda la bilaabay waa fursad muhiim ii ah si aan u gaaro hadafyadaan.

**DOORKA 3-AAD: HAWEENAY GANACSATO AH**

Waxaan ku dhashay oo aan nolosheyda inteeda badan ku noolaa magaaladaan, inkastoo aan dhowr sano ku noola qeybaha kale ee dalka intii lagu jiray xilliyadi ugu xumaa ee coladda. Waxaan ku guuleystay in aan furto ganacsi, waxaan iibiyaa badeeco kala duwan, inta badan raashinka, alabta guriga, dharka iyo qalabka dhismaha. Ganacsiga ayaa si wanaagsan u socda, waxaanan rabaa in aan dhisto guri iyo dukaan. Waxaan sanado badan bixinaayay kiro waxaana lacag badan ku khasaariyay kiro iyo guritaan joogta ah aan meelo kala u guuraayay, maadama ay miilkiilayaasha guryaha si kordhinaayeen lacagta kirada iyagoo aan tixgelinaynin heshiiska aan isla galnay. Runti waxaan ku dhibaatoonayaa sidii aan u heli lahaa dhul aan leeyahay. Dhulki uu aabahay lahaa waxaa la wareegay adeerkay wuxuuna dhahay aniga ayaa iska leh oo qayb ka mid ahna iga ma siin karo. Waxaan lacag ka bixiyay dhul kale oo halkaan ka dhow, laakin waxaa dhacday in qofka iga iibiyay uusan ahayn miilkiilaha dhabta ah qofkaas na wuxuu ii soo celiyay qayb yar oo ka mid ah lacagti aan bixiyay. Waxaan maqlay in geedi socod siyaasadda dhulka la bilaabay, runti waxaan rajeynayaa in tan ay xallin doonto dhibaatooyinkaan, si aan u helo meel aan si nabad ugu nolaado oo ku ganacsado.

**DOORKA 4-AAD: QOFKA GUDAHA KU BARAKACAY**

Qoyskeyga waxay ka soo jeedaan meel qurux badan oo miyi ah, oo 40 km u jirta magaaladaan. Qayb ka mid ah qoyskeyga ayaa weli halkaas ku nool, aniga na waxaan halkaas ku noolaa dhowr sano. Waxaan magaaladaan yimid inta lagu jiray xilligi ugu xumaa ee colaadda. Waxaan isku dayay in aan hal mar ku laabto, laakin kuma guuleysanin in aan nolosha halkaas ku bilaabo maadama aanan helin shaqo aniga, xaaskayga iyo afarteyda caruur na quudiso. Waxaan magaaladaan joogaa ku dhowaad 15 sano marwalbana waxaan helaa shaqo muddo gaaban oo mushaar aad u yar, laakin bilo qaar ayaa ka fiican kuwa kale. Waxaan ku noola qaybo badan ee magaalada, aniga oo hal meel illaa iyo meel kale u guuraayo. Ma haysto lacago ku filan in aan meelo wanaagsan kiro ku bixiyo, sidaas darteed waa inaan guuro maadama ay magaalada sii ballaranayso dadkuna ay go'aansanayaan inay dhul iibsadaan ayna dhistaan. Dhowr jeer ayaa ogeysiis la'aan la iiga cayriyay meeshi aan ku noolaa, waxaana ku waayay in badan oo ka mid ah lacagihi aan ku maalgeliyay hoygeyga. Mar walbo waa in aan kow ka soo bilaabo. Waxaan jeclaan lahaa in ugu yaraan la ii sheego meesha aan aniga iyo qoyskeyga ku noolaan karno. Haddii la i siiyo dhul yar oo aan ku noolaado, maskaxda ayaa ii degi lahayd, aniga iyo bulshada igu hareeraysan, waxaan heli lahayn meel aan wax ka bilowno. Waxaan ka soo jeeda dalkaan, sanado badan ayaa halkaan joogay, caruurtayda ayaa noloshooda oo dhan inta ku noolaa, waa xaqeena in aan helno meel aan si nabad ah ugu noolaanno.

**DOORKA 5-AAD: BEERALEY**

Waxaan ku noolahay meel u dhow webiga, 40 km magaalada ka baxsan. Bulshadeyda ayaa jiilal badan beeraley ahaa welina nolosheena ayaa ku tiirsan inkastoo, mararka qaar, qaar naga mid ah ay shaqooyin ka helaan magaalada. Dalaga ayaa si wanaagsan u baxo waxaana ka soo baxa dakhli fiican haddii aysan jirin abaaro ama daad oo soo badanaayo. Labo sano ka hor, waxaa jirtay abaar dalagu na aad buu u yaraaday; daaq la'aan awgeed, xoola dhaqatada qaar ayaa ka soo gudbay webiga iyaga oo soo maray dhulkeena. Lo'da iyo riyaha ayaa cunay dalageena intiisa badan labo maalin gudahoodna waxay haleeyeen shaqadii aan bilooyin ku qabannay. Xoolo dhaqatadu ayaa sheegay in daaqa iyo biyaha ay xaq u leeyihiin. Aad ayaan u xanaaqnay. Qoysaska kale ayaa isla dhibaatadaan wajahayay waxaana dagaal wayn lala galay xoola dhaqatada. Dad qaar ayaa la dilay, ugu dambeyntii odeyaasha ayaa xaliyay arrinta, laakin sanadki xigay ayay markale dhacday. Mid ka mid ah ehellada xoola dhaqatada ayaa sheegay in aan ka hor istaagi Karin, maadaama aan haysanin caddeyn muujinaysa in aan dhulka leenahay. Sanadkaan, aniga iyo qoyskeyga ayaa doonayna in aan si wanaagsan u ilaalinno beerteena, deyr ayaan ku wareejinnay, haddii loo baahda na, xoog ayaan ku difaacaynaa.

**DOORKA 6-AAD: ODEY DHAQAMEED**

Waxaan ahay ganacsade iyo sidookale odey dhaqameed, mararka qaar waxaan hay'ado kala duwan ka qabtaa shaqada xafiiska taasina aad ayay ii mashquulisaa waxayna i siisaa waajibaad fara badan. Waqti badan ayaan ku qaataa xallinta khilaafaadka ka dhex dhaca xubnaha bulshadeena ama u dhexeeya bulshooyinka kale. Tani waa qayb aad muhiim u ah oo ka mid ah nolosheyda waxaana ku qabtaa sharaf iyo kalsooni. Hasa ahaatee, mararka qaar, waa wax laga xumaado in lagugu yeero in aad xalliso dhibaatooyin ay ka dambeeyeen dad kale oo aan kula tashanin ka hor inta aysan go'aan qaadanin. Tusaale ahaan, mar, waxaa jiray khilaaf dhex maray labo walaalo ah oo ku aaddan milkiyadda dhul wayn oo ku yaalo magaalada duleedkeeda baxsan. Mid ayaa dalka dibeddiisa ku maqnaa midka kalena dhulki buu ka shaqeeyay maadama u mooday inay ku wanaagsan tahay in laga kireeyo Dadka Gudaha Ku Barakacay (IDPs). Midka kale markii u soo laabtay wuxuu rabay

kalabar dhulkaasi, wuxuuna diiday in uu bixiyo kharashki ku baxay horumarka u walaalkiis sameeyay wuxuuna rabay in uu dhulka ku soo celiyo sidiisi hore. Maxakamad ayuu tagay wuxuuna bixiyay lacag faro badan illaa ay maxakamaddii gaartay xukun balse xukunki maxakamadda lama fullin karin. Khilaafka labadaas u dhexeeyay ayaa noqday mid aad u dhib badan, oo ay Dadka Gudaha Ku Barakacay (IDPs) sidookale dareemeen maadama loogu hanjabay in xoog looga saari doono oo xitaa la toogan doono. Waxaan aniga iyo odeyaasha kale ku guulaysannay in aan xallino khilaafka, balse waxaan jeclaan lahaa in la helo hab ka wanaagsan oo loola tacaalo arrimaha noocaas. Waxaan maqlay inay jiri doonto siyaasad cusub ee dhulka waxaana haaya fikrado badan oo waxtar leh oo ku saabsan sida looga hortagi karo khilaafaadka dhulalka la xiriira looguna xallin karo qaab wax ku ool ah.

## Lifaaqa 6-aad. Qorshe hawleed

Qorshe hawleed, ay u badan tahay in la sameeyo dhamaadka koorsada ka hor qiimeynta ugu dambeysa, waxay ka kooban tahay shaqo shakhsiyadeed iyo mid kooxeed labaduba. Kulankaan ayaa sida caadiga ah qaato 2 saacadood, oo ay ku xiran tahay tirada kooxda.

Ujeeddooyinka kalfadhiga ayaa ah in ka-qaybgale kasta loo ogolaado:

1. Ka fikiro waxyaababaha lagu bartay maalmihi ugu horeeyay ee koorsada;
2. Ka fikiro tillaaboyinka mustaqbalka ee la qaadi doono iyo sida loogu dhaqmi doono marka laga hadlaayo aqoonta cusub ee la helay marka uu ugu laabto goobtiisa/goobteeda shaqada;
3. Is dhexgal la sameeyo asxaabta si loo suuragaliyo iskaashi dabagal ee heer urur qaran.

# Qorshaha kalfadhiga

| Waqtiga | Waxqabadka kalfadhiga |
|---|---|
| 10-20daqiido | **Hagid ku aaddan qorsheynta hawlaha:** horudhac gaaban oo ku saabsan Qorshe Hawleedka (sababta loogu arko inay muhiim tahay) iyo kalfadhiga. |
| 10daqiiqo | **Qorshe hawleed shakhsiyeed:** Kalfadhi hoosaadkaan wuxuu ka koobnaan doonaa akhrinta shakhsiyeed ee casharka la siiyay maalmihi ugu horeeyay ee koorsada iyo tixgelinta sida ka-qaybgalaha, u awooddiisa/awooddeeda shakhsiyadeed, ay awoodi doonaan inay adeegsadaan cilmiga iyo xirfadaha cusub ee koorsada marka u dib ugu laabto/ laabato shaqadeeda guriga. Qoraal warbixineed ayaa la bixin doonaa kaasi oo u ka-qaybgale kasta buuxin doono,<br>si loogu caawiyo inay dhaliyaan fikrado ku aaddan tan. |
| 60daqiiqo | **Qorshe hawleed kooxeed:** kalfadhi hoosaadkaan wuxuu ka koobnaan doonaa saddex tillaabo:<br>• Falanqeeya oo ku heshiiya 3-da arrimood ee mudnaanta leh oo ay tahay in siyaasadda dhulka ay wax ka qabato.<br>• Samee sharraxaad gaaban (ugu badnaan 2 ama 3 sadar) oo faahfaahinaaya waxyaabaha ay siyaasadda ka sheegi doonto mid kasta oo ka mid ah arrimahaan mudnaanta leh.<br>• Muuji hay'adaha doorarka muhiimka ah ka ciyaara sidii loo fullin lahaaa waxyaabaha siyaasaddaan ay bixiso. |
| 10daqiiqo koox kasta + 10daqiiqo kulanka | Dib ugu soo warbixi shirarka, oo ay ku jiraan 3-da arrimood ee mudnaanta leh, faahfaahin gaaban, iyo doorarka hay'adaha. Ka fikir hawsha. |

# Moodel loogu talagalay qorshe hawleed shakhsiyeed/waddan

| | |
|---|---|
| Magacaaga iyo ururkaaga /taarikhdaada xirfadeed | |
| Fikrad la hirgeliyo | |
| Macnaha guud ee gudaha: dhibaatooyinka/carqaladaha iyo xoogaga /fursadaha | |
| Macnaha guud ee dibedda: Fursadaha iyo hanjabaadaha | |
| Yaa loo baahan yahay in uu ku lug yeesho? | |
| Kheyraadkee loo baahan yahay? | |
| Sidee u soo bandhigi doontaa fikradaan? | |
| Gormaad bilaabi doontaa? | |

Lifaaqa 7-aad. Foomka qiimeynta ugu dambeysa

# ASTAANTA(ASTAAMAHA) abaabulayaasha /kafaalaqaadayaasha tababarka

**QIIMEYN XOGWAREYSI**

**< Sida Loo Sameeyo Siyaasad Dhul Loo Dhan Yahay >**

Taarikhda, goobta (magaalo iyo waddan)

**1= sia ad u diidan  2= diidan  3= in yar oggol  4= oggol  5= si aad u oggol**

## A. Ujeeddooyinka iyo jadwalka tababarka

1. Si cad u fahmay ujeeddooyinka tababarka.

   **1  2  3  4  5**

2. Ujeeddooyinka tababarka ee la sheegay ayaa si buuxda loo waafaqay.

   **1  2  3  4  5**

## B. Xogta iyo wadahadalka

1. Xogaha waxay ahaayeen kuwa wacyigelin ah oo dhiirigeliyay fikirkeyga.

   **1  2  3  4  5**

2. Isdhexgalka iyo wadahadallada ayaa kordhiyay aqoonteyda iyo fahamkeyga.

   **1  2  3  4  5**

3. Tababarka wuxuu ii ahaa dhiirigelin joogta ah, xiiso ii leh oo ii khuseeya.

   **1  2  3  4  5**

4. Barnaamijka tababarka waxaa loo qaabeyay si macquul ah.

   **1  2  3  4  5**

## C. Saameynta muuqata

1. Aqoonta iyo fikradaha laga soo qaatay tababarkaan waa kuwa habboon kuna filan in laga hawlgeliyo horumarinta siyaasad dhul oo loo dhan yahay oo laga sameeyo Gobolka Soomaalida.

   **1  2  3  4  5**

2. Guud ahaan, aad ayaan ugu qanacsanahay tababarkaan.

   **1  2  3  4  5**

3. Marka aan ku laabto shirkadeyda, waxaan asxaabteyda iyo daneeyayaasha kale ku wargelin doonaa tababarkaan.

   **1  2  3  4  5**

Waa maxay qaybaha koorsada ee aad ka heshay?

…………………………………………………………………………………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………………

Sidee ugu talagashay in aad ku dabaqdo wixii aad soo baratay intii koorska u socday?

…………………………………………………………………………………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………………………………………………………………………………

Hawlo dabagal oo noocee ah ayaad jeclaan laheyd in aad aragto?

…………………………………………………………………………………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………………………………………………………………………………

Faallooyinka iyo Tallooyinka kale:

…………………………………………………………………………………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………………………………………………………………………………

Waa ku mahadsantahay ka-qaybgalkaaga!

## Lifaaqa 8-aad. Bogag

# TIXRAACYADA


African Union (2010) *Policy framework for pastoralism in Africa: securing, protecting and improving the lives, livelihoods and rights of pastoralist communities,* Addis Ababa.

Bagayoko, N., Hutchful E. and Luckham R. (2016) 'Hybrid Security Governance in Africa: Rethinking the Foundations of Security, Justice and Legitimate Public Authority', *Conflict, Security & Development* 16, no.1: 1-32.

Besteman, C. and Cassanelli L. (1996) *The Struggle for Land in Southern Somalia: The War Behind the War*, HAAM Associates, London.

Besteman, C. and Cassanelli L. (2000) *The Struggle for Land in Southern Somalia: The War Behind the War*, HAAM Associates, London, revised edition.

Bradbury, M. (1993) *Development in Conflict: Experiences of ActionAid in Somalia,* Responding to Conflict Unit, Woodbrooke College and ActionAid.

Burman, J., Bowden A. and Gole A. (2014) *Land Tenure is Somalia: A Potential Foundation for Security and Prosperity*, SHURAAKO, https://shuraako.org/publications/land-tenure-somalia-potential-foundation-security-and-prosperity, last accessed 4 March 2020.

Cassanelli, L.V. (1982) *The Shaping of Somali Society*, University of Pennsylvania Press, Philadelphia.

Clos R. (2011) Chapter: Alshabab, part of the solution to the problems faced by Somalia?, in *Somalia: creating space for fresh approaches to peace building*, Life and Peace Institute, Uppsala.

Compagnon, D. (1990) 'The Somali opposition fronts: some comments and questions', *Horn of Africa* 13, no. 1-2.

Danish Demining Group (DDG) (2017) *Dadaab Returnee Conflict Assessment*, DDG and DFID, Nairobi.

Deherez, D. (2009) *The Scarcity of Land in Somalia: Natural Resources and their Role in the Somali Conflict*, Occasional Paper III, BONN International Centre for Conversion (BICC), Bonn.

Duffield, M. (1990) *War and Famine in Africa*, Oxfam (UK/I), Oxford.

Du Plessis J., Augustinus C., Barry M., Lemmen C. and Royston L. (2016) *The Continuum of Land Rights Approach to Tenure Security: Consolidating Advances in Theory and Practice*, Proceedings of the 2016 World Bank Conference on Land and Poverty, 14-18 March 2016.

Durand-Lasserve, A. and Sarod H. (2007) *The Formalization of urban land tenure in developing countries*, paper for World Bank Urban Research Symposium, 14 April 2007, http://siteresources.worldbank.org/INTURBANDEVELOPMENT/ Resources/336387-1269364687916/6892589-1269394475210/durand_lasserve.pdf, last accessed 4 March 2020.

EC/IUCN (1993) *Environmental Synopsis of Somalia*, EC, Brussels and IUCN, Gland Switzerland.

Economic Commission for Africa (ECA) (2017) *New Fringe Pastoralism: Conflict and Insecurity and Development in the Horn of Africa and the Sahel,* ECA, Addis Ababa.

FAO (2006) *Environmental Study of Degradation in the Sool Plateau and Gebi Valley, SANAAG Region of Northern Somalia*; FAO, Rome.

FIG/UNCHS (1998) *Informal Settlements, Security of Tenure, Urban Land Management and Local Governance: Experience in implementing the Habitat Agenda,* Draft Report of the Durban Conference, August 1997.

Fisher, S. (1993) *Mediation and Training Agencies*, unpublished paper, Oxfam (UK/I), Oxford.

Gundel, J. (2006): *The Predicament of the Oday: The Role of Traditional Structures in Security, Rights, Law, and Development in Somalia*, Danish Refugee Council, Nairobi.

Helander, B. (2003) Chapter: *The Huber in the Land of Plenty: Land, labour and Vulnerability Among a Southern Somali Clan*, in *The Struggle for Land in Southern Somalia: The War Behind the War*, Besteman, C. and Cassanelli L., revised edition, HAAM Associates, London.

Hoben, A. (1988) Chapter: The Political Economy of Land Tenure in Somalia, in *Land and Society in Contemporary Africa*, edited by Richard Downsand Stephen Reyna, University Press of New England, Hanover.

Jubaland, State of (n.d.) *The Provisional Constitution of Jubaland State of Somalia*, The Jubaland State of Somalia; Government of Jubaland, Kismayo.

JRIA (2016) *A report on the profiles Internally Displaced Persons living in camps of Kismayo,* Jubaland Refugee and Internally Displaced Person's Agency, Kismayo.

Jubaland Baseline Study (2016) *Qualitative Research on Political, Socio-economic, Security in Jubaland*, Kismayo.

Lederach, J.P. (1989) *NGOs and Peacemaking: A Prospect for the Horn*, Horn of Africa Project, Institute of Peace and Conflict Studies, Conrad Grebel College, Ontario.

Lewis, I.M. (1961) *A Pastoral Democracy: A Study of Pastoralism and Politics among the Northern Somali of the Horn of Africa*, Oxford University Press, Oxford.

Little, P.D. (2003) *Somalia: Economy without State,* The International African Institute, London.

Menkhaus, K. (1993) 'Foreign Assistance in the Lower Jubba Valley: The Past Record', *UNOSOM Lower Jubba Strategy Briefing Paper #3*.

Menkhaus, K. (2000) 'Somalia: A Situation Analysis', *UNHCR WriteNet Paper*, no. 7: 4-5.

Menkhaus, K. and K Craven (2000) Chapter: Alienation and the Imposition of State Farms in the Lower Jubba Valley, in *The Struggle for Land in Southern Somalia: The War Behind the War*, Besteman, C. and Cassanelli L., revised edition, HAAM Associates, London.

Menkhaus, K (2003) *Somalia: A Situation Analysis and Trend Assessment,* UNHCR, Department of International Protection.

Menkhaus, K. (2003) '*State Collapse in Somalia: Second Thoughts'*, *Review of African Political Economy*, no. 97: 405-422.

Merryman, J. (2000) Chapter: The Economy of Geedo Region and the Rise of Smallholder Irrigation in *The Struggle for Land in Southern Somalia: The War Behind the War*, Besteman, C. and Cassanelli L., revised edition, HAAM Associates, London.

Norton, G. (2008) *Land, Property and Housing in Somalia*, UN-Habitat, Norwegian Refugee Council and UNHCR; Nairobi.

Payne, G. (1997) *Urban Land Tenure and Property Rights in Developing Countries*, ZED, London.

PDRC (2003): *Somali Customary Law and Traditional Economy: Cross Sectional, Pastoral, Frankincense and Marine Norms*, Puntland Development Research Centre, Garowe, Puntland, Somalia.

Petersen, S. (2000) *Me Against My Brother. At War in Somalia, Sudan and Rwanda,* Routledge, New York.

REACH (2016) Kismayo IDP Settlement Assessment, December 2016, REACH, Geneva.

ReDSS (2016) *Local Integration Focus: Lower Juba Region. Durable solutions framework review of existing data and assessments to identify gaps and opportunities to inform (re)integration planning and programming for displacement*

*affected communities*, Danish Refugee Council, Norwegian Refugee Council and ReDSS, Nairobi.

Reno, W. (2003) 'Somalia and Survival in the Shadow of the Global Economy', *QEH Working Paper Series*, no. 100, Queen Elizabeth House, University of Oxford.

Rift Valley Institute (2017) *Land Matters in Mogadishu. Settlement, ownership and displacement in a contested city*, Rift Valley Institute, Nairobi.

Roseveare, N. (1993) 'Demobilisation: Post-Conflict Issues and Work', An Oxfam Review, Unpublished Paper, Oxfam (UK/I), Oxford.

Saferworld (2016) *Forging Jubaland: Community perspectives on federalism, governance and reconciliation*, Saferworld, London.

Samatar, Said S. (1991) *Somalia: A Nation in Turmoil*, Minority Rights Group, London.

Somalia, Federal Government of (2016) National Development Plan, 2017-2019.

Somalia Shelter Cluster (2016) Kismayo Mapping Exercise, May 2016.

Third World Institute (1992) *Third World Guide (1991/92)*, Instituto del Tercer Mundo, Montevideo.

UN-Habitat (2015) *Harmonization of the Legal Systems Resolving Land Disputes in Somaliland and Puntland: Report and Recommendations,* UN-Habitat, Nairobi.

UN-Habitat/Global Land Tool Network (2012) *Handling Land: Innovative Tools for Land Governance and Secure Tenure,* UN-Habitat, Nairobi.

UN-Habitat/Global Land Tool Network (2014) The GLTN Capacity Development Strategy, UN-Habitat, Nairobi.

UN-Habitat, Global Land Tool Network (2016) Learning for Land Tool Development and Implementation A Good Practice Guide, UN-Habitat, Nairobi.

UN-Habitat (2003) *Handbook on Best Practices, Security of Tenure and Access to Land: Implementation of the Habitat Agenda*, UN-Habitat, Nairobi.

UN-Habitat (2012) Manual Training Needs Assessment and Training Outcome Evaluation In an Urban Context, UN-Habitat, Nairobi.

UN-Habitat/IOM (2017) *Kismayo Urban Profile. Working Paper and Spatial Analyses for Urban Planning Consultations and Durable Solutions for Displacement Crises*, UN-Habitat, Nairobi.

UN-Habitat (2018) *Women and Land in the Muslim World: Pathways to increase access to land for the realization of development, peace and human rights,* UNHabitat, GLTN, AUS, UTI and UEL, Nairobi.

United Nations Environment Programme (UNEP) (2005) *State of the environment in Somalia: a desk study*, https://www.unenvironment.org/resources/report/state-environment-somalia-desk-study, last accessed 4 March 2017.

UNHCR (2016) *Weekly Update: Voluntary Repatriation of Somali Refugees from Kenya,* 22 September 2016.

World Bank (2011*) World Development Report 2011. Conflict, Security and Development*, The World Bank, Washington DC.